# Tusmada Buuga

HORDHACA ..... 3

Fahamka Sheekada ..... 3

Cadaawadii Labada Reer ..... 4

Habeenkii Xafladda(Baadhiga) ..... 6

Kulankii Roomiyo iyo Juuliyat ..... 9

Balakoonka ..... 10

Guurkii Qarsoodiga ahaa ..... 13

Dagaalkii ..... 15

Isagu Dib usoo Noqon Maayo! ..... 18

Ballanqaadkii Kaabulat ..... 20

Hurdadii Dheerayd ee Juuliyat ..... 23

Soo Noqoshadii Roomiyo ee Ferona ..... 25

Go'aankii Roomiyo iyo Juuliyat ..... 27

# HORDHACA

Mahad dhamaanteed waxay u sugnaatay Allaha ina abuuray inagana dhigay ummad muslima ah wax akhriya waxna qora. Sida aynu ognahay wax akhrisku waxa uu ka mid yahay waxyaabaha ay ummadi ku horumarto, waxaana ku tusaya in Quraankii ugu horeeyay ee soo dagaa uu ku bilaabmay wax akhris. Sidoo kale in uu afku yahay ilbaxnimada ay ummadi ku faanto, taasna waxa ku tusaya in waddamada ugu badan ee afkooda wax ku barta ay yihiin waddamada ugu horumarsan kuwaas oo isku daya in ay culuumta kala duwan ay ku turjumaan afkooda hooyo.

Ka Soomaali ahaan turjumaada culuumta kala duwan haddii ay noqoto culuumta sayniska, culuumta diinta iyo taariikhda waa meelaha aynu ka gaabinay taasina waxa ay keentay in ay dadka Soomaalidu ka qatanaadaan sheekooyin badan oo caan ah maadaama oo ayna helin cid afkooda hooyo ugu turjunta sida sheekada Roomiyo iyo Juuliyat, Kun Habeen iyo Habeen (Alfu Laylin Walayl), iyo kuwa kaleba.

Buugan wuxuu si toos u noqon doonaa turjunka sheekadii Roomiyo iyo Juuliyat taas oo ahayd sheeko caan baxday oo ruwaado laga sameeyay afaf badanna lagu turjumay taas oo keentay in aan buugan turjumo kuna turjumo afka Soomaaliga.

Sheekadan waxa qoray qoraagii caanka ahaa ee reer Ingiriis William Shakespeare waana mid kamid ah sheekooyinkiisa ugu caansan kuna saabsanayd laba dhalinyaro ah oo is jeclaa oo ay dhimashadoodii heshiisiisay labada qoys ee ay kasoo jeedeen.

Wixii qalad ah ee ka yimaada ee ah qalad madbiciya ama xaga turjumaada ah kaliya wuxuu sheegi doonaa in ay tahay markii ugu horaysay ee buug noocan oo kale ah aan turjumo. Waxaan u mahad celinayaa dadkii si toos ah iyo si dadbanba uga qayb qaatay oo ay ugu horeyso kulliyadda Iqra.

## Fahamka Sheekada

Roomiyo : halyayga sheekada kana soo jeeda reerka Montigiyu

Juuliyat: geesiyada sheekada ahna shakhsiyaadka ugu muhiimsan kana soo jeeda reerka Kaabulat

Firiir Looransa: nin wanaagsan oo u taagan caawinta Roomiyo iyo Juuliyat

Kalkaalisada(Juliet nurse): saaxiibada ugu dhaw Juuliyat ahna barbaarisadeeda

Feroona: magaalada sheekadu ka dhacday kuna taal dalka Talyaaniga

Montigiyu: odayga reer  Montigiyu

Kaabulat: odayga reer Kaabulet cadaawadna ka dhexaysay reer Montigiyu

Iskaaloos: boqorka  magaalada Feroona

Baariis: nin dhalinyaro ah oo ay is xigaan boqorka

Ruusaliin:  inantii Roomiyuu uu hore u jeclaa

## Cadaawadii Labada Reer

Magaalada quruxda badan ee Feroona ee Waqooyiga Talyaaniga, waxa jiray laba qoys oo aan is jeclayn. Runtii midba midka kale wuu necbaa. Mid kamid ah labada reer waxa la odhan jiray Montigiyu. Waxay dagaalameyeen in ka badan boqol sanno, xoogaa dad ahna way ku nafwaayeen dagaalka. Mararka qaarkood dad aan ahayn labada reer ee is laynayay midna ayaa ku waxyeeloobay dagaalka. Qofkastaa wuxuu rajaynayay in ay dagaalka joojin doonaan.

Waxa layaabka lihi wuxuu ahaa in aanu qofna garanayn waxa ay ku dagaalamayeen. Waxa sababay cadaawadda labada reer waa la ilaawey, laakiin way sii wadeen dagaalka. Markasta oo ay dagaalamaan ka laga gacan sareeyaa wuxuu badanaa dooni jiray in uu aar guto. Tanina waxa ay sababtay in uu dagaalku sii socdo oo aanu joogsan.

Aroor arooraha ka mid ah waxay qorraxdu si qurux badan uga soo baxday cirka buuluuga ah iyadoo iftiiminaysay guryihii Feroona. Shimbiruhu waxay dul fadhiyeen geedaha kana dul ciyayeen, dadkuna waxa ay bilaabayeen nolol maalmeedkoodii caadiga ahaa. Tukaanlayashu waxay fureen tukaanadoodii, caruurtuna waxay ku ciyaarayeen waddooyinka.

Laba dhalinyaro oo ku socda suuqa una adeegayay qoyska Kaabulat. “bal eeg seeftaydan cusub, Girigori” waxa yidhi mid ka mid ah labadii adeege. “miyaanay wanaagsanayn oo dhalaaleyn?”. “hubaashi waa sidaad sheegtay” wuu ku raacay Girigori. Wuxuu daawanayay saaxiibkii Samson oo wareejinaya seeftiisa cusub. “ka taxadir. Ma rabtid in ay cidi ku dhaawacanto,” waxa u digay Girigori. Si kasta ha ahaatee, Samson wuu ku faraxsanaa seeftiisa cusub. Wuu sii watay wareejinta seefta wuxuuna iska dhig dhigayay dagaal yahan. Wuxuu u malaynayay in uu cid kula dagaalami doono.

“Bal qiyaas waxaan kaga yeeli lahaa mid ka mid ah Montigiyuuga seeftayda,” wuu qoslay. “qurub qurub ayaan u jer jeri lahaa!” Seeftii wuu xareeyay waxayna sii wateen socodkoodii iyagoo kaftamaya oo qoslaya.

Intaa kadib, dhinaca kale ee waddada waxay ku arkeen laba adeege oo qoyska Montigiyu ah. “Bal eeg,” sidan waxa yidhi Samson, waxaanu u ururiyay wajiga. “Maxaad wajiga iigu ururinaysaa” Abrahaam ayaa yidhi, oo ah labada adeege ee Montigiyu ka dheer. “Haa, adaan kuu ururinayaa” Samson ayaa ku jaawaabay sidan isagoo is la weyn. “Waan samaykara sidaa waayo mudanahayga ayaa ka wanaagsan mudanahaaga. Maxaad iga qaadi kartaa?”

Wakhti badan may qaadan intay seefaha iskula baxeen oo ay dhammaantood dagaalkii bilaabeen. Daagaalkii wuxuu u bilaabmay si adag, si kastaba ha ahaatee, markii Bufaaliyo oo ahaa wiil uu adeer u yahay Montigiyu, soo cararay oo isku dayay in uu joojiyo dagaalka.

“Seefaha xareeya, doqmayahow!” sidan waxa yidhi Benfaaliyo isagoo ooyaya.

Laakiin, Benfaaliyoo muu ahayn qofka kaliya ee dagaalka arkay. Taybal, oo ahaa wiil uu adeer u yahay Kaabulat soo orday isagoo doonaya in u la dagaalamo Benfaaliyo.”Ha noqon nacas!” sidan waxa ku qaliyay Benfaaliyo. “Waxaan isku dayayaa in aan ka joojiyo dagaalka! Waa inaan ku noolaanaa nabad.” “Nabadaa?” sidan waxa yidhi Taybal.”Waan necebahay

ereygaa! Si lamid ah sidaan u necebahay Montigiyuga. Dagaalan, fulayahow! ” Wuu ku cariyay. Wuxuu Benfaaliyo ku weeraray seeftiisii. Dad kale ayaa soo cararay oo isku dayay in ay daagaalka joojiyaan, laakiin way sii kordhiyeen dagaalka. Qof kastaa wuxuu ka cadhaysnaa Kaabulat iyo Montigiyuu.

Labadii oday ee Kaabulat iyo Montigiyu waxay labadooduba joogeen suuqa iyagoo oo la socda xaasaskoodii si ay u adeegtaan. Markii ay maqleen qaylada dagaalka waxay dooneen in ay arkaan waxa dhacaya. Iyaguna waxa ay dooneen sidoo kale in ay dagaalamaan, laakiin xaasaskoodii ayaa qabtay. Umayna ogolaan in odayaashoodu ay dagaalamaan. Intaa ka bacdi waxa yimid boqorkii. Wuxuu amray in uu qof kastaa joojiyo dagaalka meeshana ka tago. “waxaaad tihiin laba nin oo waaweyn,” wuxuu ku yidhi Kaabulat iyo Montigiyu, “laakiin waxaad u dhaqmaysaan sidii laba caruura oo yar yar. Labadiinuba waxaad tihiin cadawga nabada. Waa markii sadexaad ee bishan gudaheeda ay labada reer isku dhacaan.

Haddii ay tani mar labaad dhacdo, labadiinaba waan idin ciqaabi doonaa. Xataa waxa laga yaabaa in aan idin daldalo! Kaabulat, adigu isoo raac. Montigiyu, adna casarka ii kaalay.”

Waxa jiray hal qof oo kamida reerka Montigiyu oo aan dagaalka ku jirin. Magaciisu wuxuu ahaa Roomiyo. Montigiyu iyo xaaskiisu waxay u wer wersanayeen inankooda. Way adkayd in ay arkaan isaga, markay arkaana, wuxuu u muuqday mid aad u murugaysan. Waxay waydiin jireen wuxuu la wer wer san yahay, lakiin umuu sheegi jirin. Waxay ka dalban jireen saaxiibadii in ay waydiiyaan, laakiin Roomiyo umuu sheegi jirin. Muxuu inankooda hantida leh, quruxda badan ee wanaagsan uu la murugaysnaa? May fahmi karayn.

Intaa ka bacdi Benfaaliyo ayaa u sheegay in uu arkay Roomiyo aroortii hore, intanay cadceedu soo bixin ka hor. Roomiyo wuxuu lugaynayay meel u dhaw geedo magaalada dhinaceega ah, laakiin markii uu arkay Benfaliyo, wuxuu ku cararay dhinacii geedaha, Benfaliyana kamuu daba tagin .

“Maan fahmin,” sidan waxa yidhi Montigiyu. “Dad kale ayaa iyaguna arkay xilligaas oo kale isla maalintaa. Qaar ka midi waxay arkeen isaga oo ooyaya. Intaa kadib, markii ay cadceedu soo baxday wuxuu tagay guriga wuxuuna isku xidhay qolkiisii. Wuxuu xidhay albaabadii iyo daaqadihii maalintii oo dhanna wuxuu ku jiray mugdigii. Tolow maxaa helay?”

Roomiyoo wuu murugaysnaa maxaa yeelay jacaylbaa ku dhacay. In wax la jeclaadaa kama dhigto dadka qaar murugaysan. Runtii, wayba ka farxisaa. Roomiyoo wuu murugaysnaa maxaa yeelay inanta uu jeclaa may jeclayn isaga. Waxa ay ahayd inan qurux badan, Roomiyoona wuxuu ahaa mid aad u jecel, laakiin waxay u sheegtay in aanay waligeed jeclaan doonin. Tani waa ta ka dhigtay Roomiyo mid aad u murugaysan waana sababta uu qolka isugu xidhayay maalinta oo dhan. Waxay u muuqatay in uu illaawayba sida loo dhoola caddeeyo. Mararka qaarkoodna, wuxuu rajayn jiray in uu dhinto maxaa yeelay murugadii ayaa ka tan badatay, laakiin cidna umuu sheegi jirin. Ugu dambayntii, si kastaba ha ahaatee, wuxuu u sheegay inaadeerkii Benfaaliyo, kaas oo ahaa sidoo kale saaxiibkiisa ugu wanaagsan.

“Maxaan sameynkaraa , Benfaaliyo? Maxaan sameeyaa?  Waan jecelehay Ruusaliin, laakiin iyadu xataa ima soo eegto. Ilama hadasho. Jacaylku wuxuu kaa dhigayaa mid aad u murugaysan!”

“Ha murugoonin, Roomiyow,” waxa kula taliyay Benfaaliyo. ”Waan in aad ilawdaa iyada. Mar danbe ha ka fikirin.”

“Sideen sidaa u samaynkaraa?” Roomiyoo ayaa si bilaa rajo ah u waydiiyay.

“Waxa jira hablo kale oo qurux badan oo aad eegto. Waa inaad iyaga eegtaa. Dabeeto waxaa si deg-deg ah u ilaawaysaa Ruusaliin,” Benfaaliyo ayaa u usoo jeediyay.

“Waxaasi talo maaha, Benfaaliyo! Ma jirto inan u qurux badan sida Ruusaliin. Xataa haddii ay ka qurux badan yihiin kaliya waxay iga dhigayaan inaan iyada ka fikiro. Sida kaliya ee aan ku ilaawi karaa waa inaan dhinto. Dabeeto waxa kasta waa la ilaawi doonaa!”

## Habeenkii Xafladda(Baadhiga)

Kaabulat wuxuu samaystey xaflad. Wuxuu ku marti qaaday Baariis, kaas oo doonayay in uu guursado inanta Kaabulat ee Juuliyat. Si kastaba ha ahaatee, Kaabulat wuxuu u sheegay in ay Juuliyat wali ay aad u yar tahay oo uu sugo labo sanno. Wuxuu u malaynayay in aanay fikrad fiican ahayn in hablaha la guursado marka ay aad u yar yihiin. Sidoo kale wuxuu ka fikiray in ay Juuliyat guursanayso qof ay iyadu rabto. Wuxuu u sheegay Baariis in uu noqdo saaxiibkeed iskuna dayo in ay jeclaato isaga. Dabeeto marka la gaadho wakhtiga ku haboon, way ogolaan doontaan in ay guursato. “Haddii ay ogolaato,” Kaabulat ayaa yidhi, “anna waan ogolaan doonaa sidoo kale.”

Kaabulat wuxuu siiyay, adeegihiisii, Biitar liiska dadka kasoo qayb galaya xaflada. “Dadkan utag,” ayuu yidhi. “waxaad usheegtaa in ay xaflada kasoo qayb galaan caawa”. Biitar mushkilad ayaa haysatay. Sida wax loo akhriyo muu garanayn. Muu doonayn in uu u  sheego kaabulat in aanu waxba akhriyi garanayn, sidaa darteed wuxuu qaatay liiskii wadaduuna la maray. Wuxuu go’aansaday in uu heli doono qof u akhriya una sheega magacyada liiska ku qoran. Cidii ugu horaysay ee uu arkaa waxay noqdeen  Benfaaliyo iyo Roomiyo. “Galab wanaagsan, mudanayaal.  Wax ma akhiriyi kartaan?” ayuu waydiiyay. Markuu Roomiyoo yidhi haa waan akhriyi karaa, Biitar wuxuu ka dalbaday in uu u akhriyo liiska. Roomiyoo wuxuu akhriyay dhammaan magacayadii ku qornaa liiska. Magacyada waxaa ku jirtay Ruusaliin, oo ahayd inantuu jeclaa. Markuu akhriyay dhammaan magacyadii Biitar wuu u mahad celiyay. “Mudanaheyga, Kaabulat  ayaa xaflad samaysanaya caawa, ” Biitar ayaa sidaa yidhi. “Haddii aanad ahayn Montigiyu, waxna aanad qabanayn caawa waad iman kartaa. Waxay noqon doontaa xaflad weyn. Waxaa jiri doona cunto badan iyo cabitaan badan waxaana iman doona hablo qurux badan.”

Benfaaliyo wuxuu hayay fikrad wuxuuna u sheegay Roomiyoo kadib markuu tegay Biitar.

“Ina mari aan tagno xafladda, Roomiyow. Dabeeto waxaad arki doontaa Ruusaliin, waxaanan ku tusi doona hablo badan oo ka qurux badan iyada.” “Uma malaynayo inaan heli karno hablo ka qurux badan!” Roomiyoo ayaa si murugo leh ugu jawaabey. “Si kastaba ha ahaatee, waan tagi doona. Ugu yaraan waxaan arki doonaa Ruusaliin markale. ”

“Waa in aynu xidhanaa waji xidh ama maaskarooyin, ” Benfaaliyo ayaa yidhi. “ma doonayno in ay ina aqoonsadaan. Inooma ogolaan doonan hadii ayna ina ogaadaan in aynu nahay Montigiyuu. Waxaan ku arkay liiska saaxiibkeen Markiishiyo magaciisa. Waan hubaa inuu inaga caawin doono in aynu galno. Ina mari aynu u tagnee. ” “Ma umalaynaysaa inuu ina caawin doono?” Roomiyo ayaa waydiiyay. “Dabcan haa . isagu maaha Kaabulat iyo Montigiyuu midna. Wuxuu ka tirsanyahay qoyska boqorka. Isagu wuu martiqaadan yahay. Way ufududaan doontaa. ”

Juuliyat waxay lahayd kalkaaliso daryeesha habeen iyo maalinba. Waxay ahayd barbaarisada Juuliyat ilaa malintay dhalatay. Waxay lahayd inan layidhaa Suusan, laakiin Suusan way dhimatay. Odaygeedii wuu dhintay, sidoo kale, sidaa darteed waxay wakhtigeedoo dhan ku qaadan jirtay daryeelida Juuliyat. Way xasuusan karaysay waxkasta oo nolosha Juuliyat ku saabsan wayna ka heli jirtay in ay sheekooyinka uga sheekayso. Mararka qaarkood way adkeyd in ay joojiso.

“waxay ahayd ilmihii ugu quruxda badnaa ee cidi aragto,” Ayay odhan jirtay. Intaa kadib waxay uga sheekayn jirtay sheekooyin ku saabsan sida loo socdo, sida loo hadlo, iyo sida wax loo cuno. Sheekooyinkani badanaa way ka qoslin jireen. Maalintii xaflada, Juuliyat hooyadeed waxay ka dalbatay barbaarisada inay Juuliyat u keento. “maxaad umalaynaysaa hadii lagu guursado? ” waxay waydiisay inanteedii yarayd . “Kumaan fikirayn sidaa,” Waxa ku jaawabtay Juuliyat.

“Waa hagaag , wa inaad ka fikirtaa imika,” Waxa u soo jeedisay hooyadeed. “Hablo badanoo filkaa ah baa la guursaday. Qaar kamidi waaba hooyooyin. Runtii waxaan ahaa da’daada markaan adiga ku dhalay. Baariis ayaa ku waydiistay aabahaa. ”

“Waa nin wanaagsan! Wuxuu ka tirsan yahay qoyska boqortooyada, ” Waxa tidhi barbaarisadii iyadoo faraxsan. “Ma u alaynaysaa inaad jeclaan kartid?” Waxa waydiisay Juuliyat hooyadeed. “Wuxuu imanayaa xaflada caawa. Si fiican u eeg. Indhihiisa eeg. Waxaad arki doonta inuu ku jecelyahay. Waxaan umalaynayaa in uu nin wanaagsan kuu noqon doono. Wuu ku daryeeli doonaa. Ma u malaynaysaa in aad jeclaan kartid? ”

Juuliyat may hubin. Qaar kamid ah saaxiibadaheed horaa looo guursaday, qaarna caruuray leeyihiinba. Mararka qaarkood ayay kala hadli jireen, oo ay waydiin jireen xilimaa lagu guursanayaa. Waxay badanaa ugu jawaabi jirtay in ay sideedaa ku faraxsan tahay. “Intaa waxa dheeraa, ” waxay odhan jirtay “cidi wali aabahay imay waydiisan.” Tani way ka qoslin jirtay saaxiibadaheed, waxayna isku dayi jireen in ay sii sheegaan cidday guursanayso. Dabeeto way wada qosli jireen. Juuliyat waxay ogoyd in ay farxi doonto dhawaan, laakiin waxay rajaynaysay in ayna noqon si deg-deg ah. Si kasta ha ahaatee, waxay hooyadeed u sheegtay in ay Baariis eegi doonto inta xafladda lagu jiro. “Waan eegi doonaa bal inaan

jeclaado," sidaa ayay tidhi, "waayo adaa i waydiiyay. Si kastaba ha ahaatee, waligii ilamuu hadal, sidaa darteed ma garan karo in uu ii noqon doono nin wanaagsan."

Wax kastaa diyaarbay ahaayeen xafladda. Cuntada waa la kariyay, cabitaanaduna miisaska ayay dul yaaleen. Suxuunta iyo maacuunkuba iyaguna miiskay diyaar ku ahaayeen. Nalalka waa la daaray. Waxay noqonaysay xaflad il-yartu is qabato. Martidii way timid. Qaar kamida, sida Roomiyoo, Benfaaliyo iyo Markiishiyo, waxay soo xidheen waji-xidh. Cidna may garan karayn. Juuliyat iyo hooydeed waxay tageen xafladda sidoo kale.

Roomiyoo wali muu faraxsanayn, laakiin Beenfaaliyo ayaa u soo jeediyay in uu la ciyaaro hablaha quruxda badan. Markishiyo wuu ku raacay Benfaaliyo, laakiin Roomiyoo wuu diiday. "Waad ciyaari karta, maxaa yeelay qalbigaagu ma dhaawacna. Si kataba ha ahaatee, qalbigaygu si aad ah ayuu u dhaawacan yahay. Ma ciyaari karo." "Laakiin jacaylku wuxuu kaa dhigayaa mid faraxsan," sidan waxa yidhi Markiishiyo. "Jacaylku iga ma dhigayo mid faraxsan. Maaha mid naxariis leh. Wuu ku dhaawacayaa." "If love is not kind to you, do not be kind to it, (haddii uuna jacaylku kuu naxariisan, adna ha u naxariisan.)" Markiishiyo ayaa ku jawabay. "Kaalay Roomiyow waad faraxsanaan doontaa!" "Xalay waan riyooday," Roomiyo ayaa loo soo jeediyay. "Miyaanan riyoon," Markiishiyo ayaa yidhi. "Maxaad ku riyootay?" Roomiyoo ayaa weydiiyay. "Waxaan ku riyooday inay kuwa riyoodaa badanaa been sheegaan " Waxa ku jawabay Markiishiyo. "Haa, waxay ku seexdaan furaashka iyagoo ku riyonaya waxa runta ah" Waxa yidhi Roomiyo. "Waxaan ku riyooday boqorad Maab" Waxa yidhi Markiishiyo. "Waxay waday faraskeegii indha sircaadka ahaa waxayna ka dhigaysay riyooyinka riyo jacayl. Mushkilad ayuunbay sababtaa meelkastoy tagto." "Jooji hadalka nacacasnimada ah!" Roomiyo ayaa ku qayliyay. "Haa, waa nacasnimo, maxaa yeelay waxaan ka hadlayaa riyooyin. Riyooyinku waa waxba kama jiraan. Qaar runa maaha, wax macno ahna ma leh."

"Waa in aanad u qaadan riyooyinka qaar dhab ah." "Riyadaydu waxay ahayd mid xun," Roomiyoo ayaa yidhi. "Ima siinayo dareenkaygu illaa in ay habeen xuntahay mooyaane. Waa bilawga shay aad u xun kuna dhammaan doona dhimasho."

Waxay ahyd xaflad sawaxan badan oo farxad badan. Dad badan ayaa joogay, dhamaantoodna way wada hadlayeen waanay wada qoslayeen. Si dhakhso ah, waxay gaadhay wakhtigii miisaska iyo kuraasta la qaadi lahaa si qolka loogu ciyaaro. Kaabulat wuxuu arkay martidii wajiga xidhnayd wuxuuna u sheegay in aad loo soo dhawaynayo. Wuu dhoola cadeeyay waana gacan qaday. Dabcan, muu garanayn ciday ahaayeen. Haduu ogaan lahaa iny yihiin Mantigiyuuga, gabi ahaanba lama soo dhaweeyeen. "Kaalaya oo la ciyaara hablaha, " ayuu yidhi. "Aaad baan ugu faraxsanahay inan idin arko." Waxa la shiday miisigi, dadkuna waxay bilaabeen inay ciyaaraan. Kaabulat wuxuu arkay inaadeerkii oo da'weyn wuuna ag fadhiistay. "Inagu aad baynu uga weynanay ciyaarta ,"ayuu yidhi. "Bal eeg raga xidhan waji xidhka. Xilimaa inoogu danbaysay inaynu tagno xafladaha inagoo xidhan waji xidh? Shan iyo labaatan sanno ka hor." "Maya,maya " waxa ku jawaaay inadeerkii, "way ka badan tahay intaa! Ilaa sodon sanno."

## Kulankii Roomiyo iyo Juuliyat

Roomiyo kumuu faraxsanayn joogitaanka xafaladda. Saaxiibadii way ciyaarayeen, laakiin isagu aad ayuu u murugaysnaa. Muu awoodayn in uu si farxad leh u dhaq-dhaqaaqo. Wuxuu arkay Ruusaliin wuxuuna ka fikirayay jacaylka uu iyada u hayo. Maxay u jeclaan wayday isaga? waxay ka dhigi lahayd isaga mid aad u faraxsan haddii ay jeclaato. Wuu guuxay. Wuxuu qolka u eegay si murugo leh, si deg deg ahna, wuxuu ku dhawaaday in uu wadnahu istaago. Neeftaa ku adkaatay. “Wa ayo inantaasi?” Wuxuu weydiiyay shaqaalihii. “Magaranyo, mudane.”

Waxay ahayd gabadhii ugu quruxda badnayd ee uu waligii arko. Aad ayay uga qurux badnayd Ruusaliin. Waxay shiiqisay hablihii kale. Wuxuu si deg deg ah u ilaaway Ruusaliin. Wuu ku dhaygagay iyada wuxuuna joojin kari waayay is la sheekaysiga naftiisa. “Alla, way qurux badan tahay! Way ka qurux badan tahay. Waa riyo. Qalbigaygu hore muu u jeclaaday? Maya gabi ahaanba! Hadda ayaan si dheb ah wax u jeclaaday. Waxay ka dhigtay ubuxyada quruxda badan qaar aan midab lahayn. Waxay u iftiimaysaa sida cad ceeda oo kale. Waa ta ugu wanaagsan.”

Taybal ayaa u dhawaa markuu hadlayay gartayna codkiisa. Wuxuu u sheegay shaqaalihii in uu seef u keeno. “Sidee ayuu Montigiyu ugu dhiiraday in uu yimaado halkan kana soo qayb galo xafladdayada?! Waan dili doonaa!”

Kaabulat ayaa maqlay isagoo leh sidan una sheegay in uu iska daayo Roomiyo. “Wuxuu u dhaqmayaa si wanaagsan, cidna waxba ma yeelayo. Waan ogahay in uuna imaadeen halkan , laakiin ha inaga rabshin xafaladda adoo dagaal ku bilaabaya, Taybalow.”

Taybal wuu la murmay, Kaabulatna wuu xanaaqay. “Hayla murmin! Anaa halkan ka mudane ah, adna kaliyaata waxaad tahay inan. Adigu maaha inaad go’aamiso. Faraha ka qaad!”

Taybal cadhuu jiq noqday, laakiin wuxuu go’aansaday in uu is dajiyo. Wuxuu aargudashadiisa u dhigtay maalin kale. Wuxuu qolka ka baxay isaga oo aad u cadhaysan.

Roomiyoo, isla wakhtigaa, wuxuu u tagay Juuliyat si uu ula hadlo. Wuxuu taabtay gacanteedii. Waxay taabatay gacantiisii. Waxay is waydaarsadeen hadalo. Wuxuu si deg dega ugu qaaday jacayl. Iyana waxay u qaaday jaceyl sidoo kale. Wuu dhunkaday. Way dhunkatay. Midba midka kale ayuu eegay indhihiisa. “Hooyadaa ayaa ku doonaysa!” waxay ahayd barbaarisadii Juuliyat. Juuliyat waa inay maqashaa. Waxay ka tagtay Roomiyo waxayna u tagtay hooyadeed. “Hooyadeed waa tuma?” Roomiyoo ayaa weydiiyay barbaarisadii. “Waa marwada guriga,” ayay ku juwaabtay barbaarisadii. “Waa xaaska Kaabulat. Waxaan soo barbaariyay inanteeda.  Waxay ahayd inantii aad la hadlaysay.”

Roomiyoo wuxuu xaqiiqsaday in uu wax ka jeclaaday reer Kaabulat. “Alla maya!” ayuu ku fikiray. “Maxaan sameyn doonaa? Waxaan jeclaaday cadawgeygii! Maxay tani iigu dhacday?”

Waxay gaadhay wakhtigii xafladu dhamaan lahayd ee ay martidu tagi lahayd. Kaabulat wuxuu ka dalbaday martidii waji xidhka xidhnayd inay sii joogaan, laakiin waxay u sheegeen inay tagayaan. Markay tagayeen, Juuliyat waxay waydiisay barbaarisadeedii yay ahaayeen nimankani. "Keebuu ahaa kii aan ciyaaraynin?" ayay waydiisay. "ma garanayo,"Waxa ku jawaabtay barbaarisadii. "Fadlan utagoo magaciisa soo waydii." Juuliyat ayaa ka bariday.

Waxay ka baqanaysay inuu yahay nin xaas leh, lakiin markay kusoo noqotay barbaarisadii una sheegtay inuu yahay Roomiyo, Mantigiyuu, waxay xaqiiqsatay inay ka sii darantahay.

"Jacaylkaygii kaliga ahaa wuxuu ka yimid nacaybkaygii kaliga ahaa!" ayay ku fikirtay. "Maxaan samayn dooonaa? Waxaan jeclaaday cadawgaygii ugu xumaa! Siday tani iigu dhacday?"

Markuu Rooiyoo jeclaa Ruusaliin, iyadu may jeclayn isaga. Wuxuu ku fikiray in ay tahay dhibaato, kana dhigaysa isaga mid aad u murugaysan. Kaliyaata wuxuu doonayay wuxuu ahaa inantuu jeclaa inay isaga jeclaato, imika wuxuu jecel yahay Juuliyat, Iyana waxay jeceshehay inta uu jecel yahay oo kale. Si kastaba ha ahaate, tani waxay ahayd dhibaato ka weyn. Qoysaskoodu waa ay is necbaayeen, waxbana kamay qaban karayn jacaylkooda. Roomiyo wuu si niyad xumaaday, Juuliyatna Iyana way niyad xumeyd. Maxay samayn karaan? Laga yaabaa Roomiyoo wuu saxsanaa markuu yidhi xafladani waa bilawga shey xun.

Kadib xafladdii, Roomiyoo wuxuu bilaabay in uu u lugeeyo gurigii, laakiin ma samaynkaro. "sideen u tagi karaa qalbigayga oo halkan jooga?" ayuu iskula sheekaystay. Wuxuu soo war wareegaba wuxuu ku soo laabtay gurigii Kaabulat. Wuxuu koray dayrkii beerta si uu ugu dhawaado guriga. Benfaaliyo iyo Markiishiyo isaga ayay raadinayeen. Waxay kor ugu dhawaaqayeen magaciisa. "Wuxuu tagay sariirtiisii," Markiishiyo ayaa yidhi. "Maya, waxaan arkayay isagoo fananya dayrka beerta," waxa yidhi Benfaaliyo. "U yeedh!" Markiishiyo ayaa markale u dhawaaqay. "Roomiyow, Roomiyow! Kumee? Soo bax oo iskaaya tus! Waxaan kuugu dhawaaqayaa magacii quraxda badnaa ee Ruusaliin." Xataa wuxuu yidhi waxyaabo xun xun oo Ruusaliin ku saabsan. Wuxuu u malaynayay in tani ka dhigi doonto Roomiyo mid xanaaqsan. Kadib laga yaabaa in uu soo noqdo oo la dagaalamo. Laakiin tani wax macnaa may sameynayn. May jirin wax jawaaba, Roomiyoona kama suu bixin mugdiigii geedaha ee beerta. "Ilaayo intuu jeclaaday Ruusaliin, wuxuu jecel yahay in uu joogo mugdigaa," Benfaaliyo ayaa yidhi. "Waxaan u malaynayaa in aan ka tagi doono halkan. Ma helayno haddi uuna doonayn in la helo." "Taasi waa run," Markiishiyo ayaa ku raacay. "Nabad galyo, Roomiyoo! Gurigii ayaan tagaynaa sariirahayagii sida fiican u goglanaa!"

## Balakoonka

Roomiyoo wuxuu maqlay dhawaaqa saaxiibadii, laakiin umuu jawaabin. Waxay ahayd qabaw iyo mugdi beerta Kaabulat. Muu danaynayn qabawga. Muu danaynayn mugdiga. Muu danaynayn saaxiibadii. Kaliyaata wuxuu danaynayay jacaylkiisa cusub, Juuliyat. Wuxuu

fadhiistay isagoo gariiraya wuxuuna eegay guriga isagoo ku riyoonaya quruxdii Juuliyat xasuusanayana dhunkashadeedii. Wuxuu xasuustay eray kasta oo ay kula hadashay. Wuxuu rajaynayay in uu arki doono markale una sheego inta uu illaa xad jecel yahay. Wuxuu arkay iftiinka mid kamida qolalka, dabeeto wuxuu arkay inan kasoo baxaysa qolka soona istaagaysa balakoonka. Way adkayd in uu rumaysto! Waxay ahayd Juuliyat, wuuna arki karayay! Waxay ka iftiin badnayd xidigaha kana layaab badnayd dayaxa. Dhabankay gacanta saartay, Roomiyoona wuxuu rajaynayay inuu ahaan lahaa golofisyada gacmaheega si uu u taabto wajigeeda.

Juuliyat way guuxday waxayna ku xanshaashaqday, “Alla, qaaligaygiyow!” Roomiyoo aad ayuu u faraxsanaa. Codkeedu wuxuu ka qurux badnaa muusigoo dhan. Wuxuu ahaa codkii ugu quruxda badnaa ee uu waligi maqlo. Wuxuu doonay inay mar labaad ay hadasho, wayna hadashay. Iyadu may ogayn in uu Roomiyoo beerta jooga. Manay moodayn in uu Roomiyo maqli karayay.

“Alla, Roomiyo, Roomiyow! Maxaad Roomiyo u noqotay? Maxaad mantigiyuu u noqotay? Iska ilow aabahaa magacaagana badal. Hadii aanad awoodeyn, anigaa iska illoobaya aabahay magacaygana badalaya. Masii ahaan doono Kaabulat.” Roomiyo wuxuu ku dhawaaday inuu hadlo lakiin wuxuu go’aansaday inuu dhagaysto waxa kale ee ay tidhaahdo. Codkeedu aad ayuu u quruxbadnaa! Wuxuu ka dhigayay qalbigiisa inuu farxad la riyaaqo. Juuliyat way sii wadatay inay kor u fikirto. “kaliyaata magaacagu waa cadawgayga. adigu waxaad tahay naftaada, waxkastuu magacaagu ahaado. Mantigiyuugu waa ayo? Maha gacan ama lug. Kaliyaata waa magac. Alla, magac kale noqo! Magacu muxuu yahay? Ubuxu urta wali wuu la haanayaa hadii magac kale loogu yeedho, Roomiyana wuxuu ahaan doonaa mid la jecelyahay hadii aynu magac kale ugu yeedhno. Magacaaga badal oo i kaxee, Roomiyow.”

Tani aadbay ugu badnayd Roomiyo. Muu sii aamusnaan karayn.

“Haddii aad tidhaahdo i jeclow, waan badali doonaa magacayga,” sidaas ayuu yidhi. “Hadda laga bilaabo, Roomiyo ma ahaan doono!” Juuliyat way yaabtay in codkaa maqasho. “Adigu yaad tahay?” ayay ku qayliday. “Maxaad isugu qarinaysaa beertayada una dhagaysanaysaa hadalkayga?” “Kuuma sheegayo cidaan ahay, waayo magacaygii waan waayay,” Roomiyo ayaa ku jawaabay. “Magacayga waan necebahay waayo adaa neceb.” “Codkaagaan gartay! Miyaanad Roomiyo ahayn?” “Maya haddii aanad doonayn in aan noqdo!” Juuliyat si deg deg ah ayay u naxday. “Sidee ayaad halkan kusoo gashay? Way adag tahay gidaarka beerta in lasoo fuulo. Haddii cidi ay halkan kugu aragto, way ku dili doonaan waayo waxaad tahay Montigiyu.” “Jacaylka ayaa ii fududeeyay in aan gidaarka soo fanto waayo gidaaradu ma celiyaan jacaylka,” Roomiyo ayaa yidhi. “Jacaylkuna kama baqo halista. Haddii uu qoyskiinu i neceb yahay, ha i dilaane daa. Waxa ka wanaagsan inaan udhinto nacaybkooda intaan u dhiman lahaa jacaykaaga la’aantii.” Juuliyat wali way wer wer sanayd. “Sidee ayaad ku ogaatay halka layga helo?” ayay waydiisay. “Waa jacayl. Haddii aad kun mayl ka shishayso bada, jacaylkayga ayaa ii kaa keenaya.” Juuliyat waxay ku faraxsanayd inay ahayd mugdi waayo maxaa yeelay wajigeedaa ayaa badelmay farxad darteed manayna doonayn in uu Roomiyo arko. “Miyaad i jeceshahay?” ayay waydiisay. Way ku adkeyd inay rumaysato. Waxay ogayd inay ragbadan idhaahdeen waxbaanu jecelnahay dabeeto markii danbe is

badaleen. “Hadii aad si dhaba ii jeceshahay ana si dhabaan kuu jeclaan doonaa xataa hadii aad tahay Montigiyuu. Aduu waad ogeyd inaan ku jecelahay waayo anoo sidaa leh ayaad maqashay. Jacaykaygu waa run waanu jiridoonaa waligii.” “Waan ku jecelahay,” Roomiyo ayaa ku dhawaaqay.

Juuliyat aad bay u faraxsanayd, lakiin sidoo kale way werweraysay. Wax kastaa degdeg ayay ahaayeen. Waxuu ahaa sida hilaacoo kale. Roomiyo sidoo kale wuu werwersanaa. Wuxuu ka baqayay inay waxanoo dhan riyo noqdaan. Tolow may rumoobi doontaa? Barbaarisadii ayaa Juuliyat u yeedhay, waa inay gudaha gashaa. Daqiiqad ka bacdi, ayay soo baxsaday markale. Roomiyo wali halkii ayuu joogay. “Waxaan kusoo diri doonaa barbaarisadayda si aan bari kuu arko,” ayay u sheegtay Roomiyo. “Usheeg iyada goobta iyo goorta aan kugula kulmayo sidaa darteed si aan isku guursano. Noloshayda inta ka hadhay adaan kula socondoona, meelkastood tagto. Habeen wanaagsan, Roomiyahaygii qaaliga ahaayow, jacaylkaygiiyow! Waan ku jecelahay! ” “Waan ku jecelahay sidoo kale!” Roomiyo ayaa ku jawaabay.

Waxay ku noqotay qolkeegii. Daqiiqad ka bacdi, ayay soo baxday mar kale waxayna u yeedhay Roomiyo isagoo sii tagaya. “Goorma Ayaan kusoo diraa barbaarisada?” “Sagaalka subaxnimo, Roomiyo ayaa ku jawaabay.”

Labadooda midna muu dooneyn inuu tago laakiin Juuliyat waa inay ugu danbayn gudaha gashaa. Roomiyo waxoogaa ayuu sii joogay, hadii ay soo baxdo mar kale. Juuliyat may soo bixin mar kale sidaa darted wuu iska tagay. Waa inuu dhakhsadaa uuna waxkasta diyaariyaa oo ku saabsan arooska.

Waxay gaadhay subaxii. Wali cirku iftiin badan muu lahayn lakiin dad yar ayaa soo jeeday. Mid kamida dadka soo jeeday waxa kamida Baadari da’ weyn oo la odhan jiray Firiir Luuransa. Way adkeyd in lays arko, lakiin wuxuu ku jiray beerta wuxuuna soo gurayay waxoogaa caleena. Wuxuu garanayay dhirta caawisa dadka markay bukaan, wuxuuna garanayay kuwa dadka dilikara. Wuxuu beertiisa uga shaqaynayay si qunyara oo taxadir leh. Kadib wuxuu maqlay cod leh subax wanaagsan. Wuxuu ahaa Roomiyo kaas oo badanaa u iman jiray Baadariga da’da weyn si uu ugala hadlo dhibaatooyinkiisa iyo sirihiisa.

“Maxaa xiligan kusoo jeediyay, Roomiyo?” Haddii ay dadka waaweyni xiligan soo jeedaan, maxaa yeelay waxa jira wer wer badan oo ay la seexan waayaan. Dhalinyartu waa in ayna xilli hore soo kicin. Ma waxaad ka fikiraysaa Roosaliin. “Roosaliin? Maya, Firiirow, waan ilaaway magacaa iyo dhibaatooyinkii ay ii keentay. Iyadu imika waxba maaha.” Dabeeto Roomiyo wuxuu u sheegay Baadarigii waynaa wax kasta oo ku saabsanaa xafladdii ka dhacday guriga Kaabulat iyo kulankii isaga iyo Juuliyat. “Iyada waan jecelahay, iyaduna way i jeceshahay. Waxaan doonayaa inaad isku kaaya guuriso maanta!” Firiir Looransa aad ayuu uga fajacay isbedelka uu ku arkay Roomiyo. “Maxaad ka yeeli doonta jacaykii Roosaliin?” ayuu waydiiya. “Iyada aad ayaad u jeclayd, iyadaanad danayn jirtay markasta. Aad ayaan ugu faraxsanahay in aad joojisay jacaylkeedii, laakiin run ahaantii si degdega ma a u ilaawi kartaa iyada.” “Adigu badanaa waxaad ii sheegi jirtay inaan ilaawo jacaylka,” Roomiyo ayaa ku

jawaabay. “Haa, laakiin maad ilaawin jacaylkii. Waxaad joojisay jacayl, waxaanad bilawday jacayl kale!” Firiir Looransa ayaa saxay.

“Ha iga cadhoonin, Firiirow, maxaa yeelay qoftaan imika jecelahay, way i jeceshahay. Laakiin Roosaliin sidaa may ahayn.” Firiir Looransa ayaa ka fikiray “Aad ayay u fiicantahay, waan kuu guurin doonaa,” Baadarigii ayaa sidaa yidhi. Firiir Looraansa wuxuu ka fikiray in ay Roomiyo nacasnimo ku ahayd in uu si yar oo fudud jacayl u qaado, laakiin waxaa jirtay sabab wanaagsan oo uu ku raacay in ay is guursadaan Montigiyu iyo Kaabulat. Waxanoo kale may dhicin in ka badan boqol sanno. Wuxuu nacay dagaalka labada reer in ka badan dadka kale. Wuxuu rajaynayay in guurka Roomiyo iyo Juuliyat ay ka caawin doonto in uu labada reer ka dhigo qaar heshiisa, sidaa darteed dagaalku wuu joogsan doonaa.

## Guurkii Qarsoodiga ahaa

Markiishiyo iyo Benfaaliyo may helin Roomiyo. “Tolow halkuu joogaa?” Markiishiyo ayaa waydiiyay. “Miyuu yimid guriga xalaytoole?” Benfaaliyo wuxuu ku noqday guriga wuuna ka soo hubiyay. Roomiyo muu iman guriga, waalidkiina way ka wer-wer sanaayeen. Mid ka mida shaqaalihiii ayaa u sheegay Benfaaliyo in uu Taybal usoo diray waraaq Roomiyo. “Waan hubaa in uu doonayo in uu Roomiyo la dagaalamo,” Markiishiyo ayaa yidhi. “Laakiin miskiinka yar ee Roomiyo ma dagaalami karo, waayo jacaylkii Roosaliin ayuu la bukaa. Maxay faa’ido leedahay Benfaaliyo jacaylka qof aan ku jeclayn? Waxay burburinaysa noloshaada! Taybal wuu dili doona isaga, waayo isagu waa dagaal yahan. Runtii, waa dagaal yahanka ugu wanaagsan Ferona!” Labada saaxiib aad ayay ugu murugsanaayeen Roomiyo. Tolow Taybal muu helay isaga? Halkuu joogaa? Si lama filaana ayay u arkeen. Halkooda ayuu usoo socday, isagoo xoog u dhoola caddaynaya. “Waar bal joog, Roomiyo, halkeed joogtay xalay? Waxaynu wada tagnay xafladdii, laakiin waad naga tagtay,” Markiishiyo ayaa yidhi.

“Waan ka xumahay,” Roomiyo ayaa ku raali galiyay. “Hawl muhiima ayaan leeyahay imika.”

Wuxuu bilaabay in uu usheego waxoogaa kaftana wayna qosleen. “Tan ayaa ka wanaagsan ka hadlida xanuunka jacaylkaaga,” Markiishiyo ayaa yidhi, isagoo ku qoslaya. “Imika waad faraxsan tahay mar kale. Waxaad tahay Roomiyahanu naqaanay. Roomiyihii murugaysnaa ee aan shalay aragnay adiga muu ahayn runtii.” Roomiyo iyo Benfaaliyo way qosleen waxaanay diyaar u ahaayeen inay arintan ku murmaan, laakiin inyar ka bacdi, gabadh da’weyn ayaa u timid waydiisayna inay garanayaan inan yar oo la yidhaa Roomiyo. “Haa, anaa garanaya,” Roomiyo ayaa ku jawaabay, “lakiin saad u doondoonaysid uma yara. Wuu ka weyn yahay imika!”

Roomiyo saaxiibadii way ku qosleen kaftankiisii, xataa gabadhii weynayd way ku qososhay. Si kasta ha ahaatee, way joojisay qosolkii markii uu Markiishiyo da’deeda kula kaftamay. “Nin nooceeya ayaad tahay?” gabadhii weynayd ayaa waydiisay. “Waa nin nacas ah,” Roomiyo ayaa yidhi. “Anaa kuu sheegi doona cidaan ahay. Waxaan ahay Roomiyo.”

Gabadhii weyneyd ayaa si cadho leh u eegtay Markishiyo kadib ka codsatay Roomiyo in ay kaligii la hadasho. Benfaaliyo iyo Markishiyo ayaa yidhi cashada ayaan guriga Roomiyo aabihii ku kulmi doonaa wayna ka tageen.

Gabadhii wayneyd ayaa Roomiyo u sheegtay in ay tahay barbaarisadii Juuliyat. Juuliyat ayaa soo dirtay si ay uga soo qaado fariin isaga. Barbaarisadu wali waxay ka cadhaysnayd kaftankii Markishiyo umanay bogin Roomiyo ugu horeyntii. Way wer-wersanayd waayo maxaa yeelay Juuliyat waxay ahayd inan aad u yar, manay doonayn in uu Roomiyo sameeyo wax aanay Juuliyat ku faraxsanayn.

Roomiyo wuxuu u sheegay oo uu ku cel-celiyay in uu Juuliyat jecel yahay uuna dhibi doonina. Kadib waxuu ugu dhiibay fariin Juuliyat. "Usheeg inay iigu timaado casarka gurigii Firiir Looransa. Waa inay usheegtaa inay booqanayso Baadariga soona baryayso. Firiir Looransa wuu ogolaaday in uu isku kaayo guuriyo. Kadib arooska, guriga ayay tagi doontaa kadib anigaa soo booqan doona caawa."

Kadib wuxuu u sheegay in ay ku sugto gidaarka agtiisa, saacad gudaheedna, qof ayaa u keeni doona xadhiga salaanka ah. Wuxuu sheegay in uu isticmaali doono xadhiga wixii habeenkaa ka danbeeya, una isticmaali doono in uu ku soo koro balakoonka Juuliyatna soo booqdo.

Barbaarisadii waxay u sheegtay Roomiyo wax ku saabsan Baariis, laakiin Roomiyo kamuu wer-wersanyn isaga. Wuxuu ogaa in ayna Juuliyat cidaan isaga ahayn jeclayn, guursanaysa isaga casarnimada. Intaa kamuu sii faraxsanaan karayn.

Juuliyat waxay si bilaa samir ah u sugaysay soo noqoshada barbaarsida. Waxay sii maqnayd in ka badan seddex saacadood. Markay timi barbaarisadii, Juuliyat waxay waydiisay wuxuu Roomiyo yidhi. "Waan daalanahay," barbaarisadii ayaa tidhi. "Idaa aan yara nastee. Cagahaa i xanuunaye." "Waxaan jeclaan lahaa inaad lugahayga lahaan lahayd, anna aan heli lahaa warka," Juuliyat ayaa ku qayliday. "Bal kaalay barbaariso, ii sheeg wuxuu Roomiyo yidhi. Ii sheeg, fadlan ii sheeg!" "Maxaad sidaa ula deg degaysaa, miyaanad in yar i sugi karin? Naqaskaa i haya!" "Siduu naqasku kuu hayaa adoo wali awooda in aad ii sheegto in uu naqasku ku hayo? Samir la'aantaadu kama dhigayso fariinta mid ka dheer inta ay tahay! Kaliyaata ii sheeg in ay fariin fiican ama mid xun tahay, anna waan dhagaysan doonaa inta hadhay!"

"Waan nin wanaagsan. Waxaan u malaynayaa in uu qurux badan yahay waxaanu u muuqdaa mid naxariis leh"

"Taa hore ayaan u ogaa," Juuliyat ayaa tidhi. "Muxuu ka idhi arooska? ii sheeg taa!"

"Madaxaa i xanuunaya. Waxaan u malaynayaa inuu ii kala jabi doono labatan qaybood. Dhabarkaa i xanuunaya, sidoo kale." Juuliyat waxay arki karaysay in aanay barbaarisadu waxba u sheegayn ilaa ay diyaar noqonayso. Way isku dayday in ay samirto una duugto dhabarka. Waxay ogayd in aanay barbaarisadu waxba u sheegayn ilaa intay nasanayso.

"Waan ka xumahay ma wanaagsanid. Fadlan barbaarisadaydii aan jeclayey, muxuu jacaylkaygu ku idhi?" "Hooyadaa meeday?" Barbaarisadii ayaa waydiisay. "Hooyadaa

meeday? Hooyadaa meeday? Qolkeegay ku jirtaa. Ma sidaas ayuu ku idhi jacaylkaygu? 'Hooyaday meeday'" Juuliyat ayaa u waydiisay si dheel dheel ah.

"Ha nacasoobin, dabcan maya! Hadii aad doonayso inaad igu qososho, adaa fariimahaaga doonan doona imika laga bilaabo! Waxaan u baahanahay barkin aan dhabarka saaro!"

Juuliyat waxay u keentay barkintii barbaarisadii. Kaliyaata si ay barbaarisadu ugu sheegto wuxuu yidhi Roomiyo. "Waxaad tagtaa casarka Firiir Looransa gurigiisii. Nin ayaa kugu sugaya si uu kaaga dhigto xaaskiisa." "Haa! waad mahadsantahay barbaariso! waad mahadsantay barbaariso!" Juuliyat ayaa ku dhawaaqday. Si farxad leh ayay uga dhex carari kartaa qolka. Waxay u sheegtay waalidkeed si ay usoo tukato, laakiin dabcan, waxay tagaysaa gurigii Baadari Luuransa si loo guursado.

Roomiyo wuxuu ku sugayaya gurigii Baadari Luuransa. Roomiyo muu joojin ka sheekaynta Juuliyat. Wuxuu u sheegay Baadari Luuransa sida ay u qurux badnaan doonto una faraxsanaan doonto marka ay is guursadaan. "Daqiiqad kaliya oo aad la joogtaa waxay u dhigantaa noloshoo dhan.," sidaasuu yidhi. "Ka taxadir" Baadari Luuransa ayaa ugu digay. "Jacaylka deg-degii wuxuu leeyahay dhamaad deg-dega ("Sudden love has a sudden end") waxa wanaagsan inaa aanad si xad dhaafa wax u jeclaan."

Ka hor Roomiyo intaanu u jawaabin Baadari Luuransa, Juuliyat ayaa soo carartay. Waxay si toos ah ugu soo carartaya Roomiyo wayna dhunkatay. Kadib waxay ku tidhi galab wanaagsan Baadariga, kadib seddexdoodii waxay tageen kiniisad yar oo guriga Baadari Luuransa agtiisa ah. Muu ahayn nooca arooska ah ee ay habluhu ku riyoodaan. Juuliyat may xidhnayn dharkii arooska. May wadan minxiisad. Muu jirin qof arkaa oo u dhoola caddeeya, laakiin waxay haysatay ninkeedii, waanay ku faraxsanayd. Wax kale may danaynayn. Waxay ahayd xaaska Roomiyo taasaana ku filnayd. Roomiyo ayaa ahaa ninkeeda quruxda badan, naxariista badan ee ay jeceshahay iyana waxay ahayd xaaskiisa.

## Dagaalkii

Galabnimadaa way kululayd, Benfaaliyo iyo Markiishiyo dibada ayay u baxeen. "Aad ayay u kulushahay," Benfaaliyo ayaa yidhi. "Inagu celi gudaha. Haddii aynu aragno cid Kaabulat ah, waan hubaa in uu dagaal dhici doono. Badanaa dagaalku wuxuu dhacaa maalmaha kulul."

"Maxaad ka hadlaysaa?" Markishiyo ayaa waydiiyay. "Adigu badanaa waxaad tidhaahdaa madoonayo in aan dagaalamo, laakiin adiga ayaa ka dagaal badan cid walba oo kale. Waxaad u dagaalantaa sababta kasta oo laga fiican yahay. Waxaan arkay adiga oo la dagaalamaya nin ku qoslay kaftankaaga. Waxaad tidhi wuxuu u qoslay si aada waxa uuna kiciyay aygaagii jiifay waddada. Cid walba oo aan xusuusto adiga ayaa ka dagaal badan. Waxaanad ii sheegaysaa ka fogaanshaha dagaalka? Ha nacasoobin!"

"Ma anigaad iigu yeedhaysaa nacas? Adiga ayaa iga dagaal jecel. Waxaan xusuusta…."

Waxay ku dhawaayeen in ay dagaalamaan markii Taybal, Betriishiyo iyo qaar kale oo Kaabulat ahi arkeen. “Halkan kaalaya Kaabulatow,” Benfaaliyo ayaa yidhi. “Waxba igama galin,”Markiishiyo ayaa yidhi. “iyagu ha imaadaan.” Way yimaadeen. “ Markiishiyo, maalmahan danbe waxaad la saaxiib tahay Mantigiyuuga,” Taybal ayaa yidhi. “side? Waan dooran karaa saaxiibadayda ii gaarka ah,”Waxa ku jawaabay Markiishiyo. “Dabcan waa dooran kartaa,laakiin waxaan u malaynayay inaad saaxiibo wanaagsan dooranayso!” Taybal ayaa si dhee dheel ah u idhi.

Kaabulatiskii kale way qosleen, laakiin Markiishiyo wuu cadhaysnaa. Tani way ugu filnayd kana badnayd sabab ay ku dagaalamaaan. “Hadii aad doonayso inaad dagaalanto,”Banfaaliyo ayaa yidhi, “Waa inaan meel banaan tagnaa. Cidkastaa way ina arki kartaa hadii aynu xalkan ku dagaalano.”

Markiishiyo aad buu u cadhaysnaa wuxuuna doonayay inuuu dagaalamo,walina wuu u cadhaysnaa Benfaaliyo sidoo kale. “Dadku indhay leeyihiin wax ku arkaan,” Ayuu yidhi, “ha arkaan waxay doonan. Ma tagayo meelna!”

Seefahoogii ayay la baxeen waxayna diyaar u ahaayeen inay dagaalamaan. Intayna bilaabin, si kasta ha ahaatee, Roomiyo ayaa yimid. Guurkii qarsoodiga ahaa wuu soo dhamaaday, Juuliyatna gurigoogii ayay qabatay. Wuxuu rajaynayay inuu iyada arko mar labaad caawa. Markii uu Taybal isaga arkay, wuxuu u sheegay Markiishiyo inuu seefta ka fogeeyo. “Waakan ninkaan doonayay inan la dagaalamaa!”Ayuu yidhi. Kadib wuxuu Roomiyo ugu yeedhay magacyo xun xun. Roomiyo wuxuu sheegay inaanu waxaa midna ahayn, taasoo tusaysay inaanu Taybal waxba ka garanayn isaga, sidaa darteed wuxuu ku yidhi Taybal nabad galyo wuuna iska socday. Si kasta ha ahaatee Taybal umuu ogalaan inuu si fudud ku tago. “Kaalay! ila Dagaalan!” ayuu ku cariyay. Roomiyo wuxuu xasuusiyay isaga inuu boqorku joojiyay dagaalka ciqaabi donana kuwa dagaalama laga yaabana inuuu daldalo. “Sidoo kale,”ayuu yidhi, “Wax kaa cadhaysiiya kugumaan samayn. Maxaynu u dagaalamaynaa, Kaabulatkii wanaagsanaayow?” Roomiyo jawaabtiisu waxay ka cadhaysiisay Markiishiyo. Muu garanayn inuu Roomiyo soo guursaday kaabulat. Wuxuu u malaynayay inuu Roomiyo ka awood badnan doono yeelidoonan inuu la dagaalamo Taybal. Wuxuu ku qayliyay Taybal, waxayna bilaabeen dagaalkii. Roomiyo wuxu ka dalbaday Benfaaliyo inuu caawiyo si uu dagaalka u joojiyo. Si kasta ha ahaatee, Taybal wuxuu ku dhuftay Markiishiyo seeftiisii. Dabeeto isagiyo saaxiibadii way carareen. Benfaaliyo wuxuu diray cid dhakhtar ugu yeedha Markiishiyo, kaasoo si aad ah u dhawaacna.

“Maaha nabar qoto dheer,” Roomiyo ayaa yidhi. “Maya, sidaasi uma sii qoto dheera, hadana waa nabar xun. Bari kuma arki doono. Waan dhiman doonaa.”

“Waan necebahay labadiina reerba,” Roomiyo ayuu ku yidhi. “Waan dhimanayaa maxaa yeelay adaa kuu dagaalamayay si aan kaaga dhiciyo nacaskaa Taybal, adna waxaad isku dayaysay in aad naga joojiso! Waad mid ku xun in ereyo lagu cabiro! igu caawi inaan guriga galo, Befaaliyow. Waxaan u baahanahay inaan jiifsado.”

Benfaaliyo ayaa caawiyay Markishiyo si uu u galo guriga una helo sariir uu dul jiifsado. Roomiyo aad ayuu uga xumaaday maxaa yeelay saaxiibkii ayaa la dhaawacay.

“Maxay tani u dhacday?” ayuu ku fikiray. “Waxay u dhacday waayo ma doonayn in aan la dagaalamo Juuliyat inaadeerkeed, Taybal. Imika saaxiibkay ayaa dhaawacan.”

Benfaaliyo wuxuu daawanayay Markishiyo oo sariirta dul yaala. Markishiyo aad ayuu u cadaa. Si lama filaana, Benfaaliyo ayaa qaliyay, “Markishiyo ayaa dhintay!”

Roomiyo aad buu u murugaysnaa waxaanu usoo cararay dibada. Wuxuu helay Taybal wuxuuna u sheegay in uu dilay Markishiyo. “Waligii dib uma soo noqanayo!” ayuu ku ooyay. Wuxuu la soo baxay seeftiisa. “Adiga ama aniga ama labadeenaba, ayaa raaci doona!”

Taybal waxa uu la soo baxay seeftiisii. “Adaa raaci doona!” ayuu ku qayliyay kuna cararay dhinacii Roomiyo. Taybal wuxuu ahaa dagaal yahan, laakiin Roomiyo aad uu u cadhaysnaa tanna waxa ay ka dhigtay mid ka dagaal yahansan Taybal wuuna dilay.

“Roomiyow!” Benfaaliyo ayaa ku qayliyay. “Degdeg! Hore u carar! Boqorku wuu ku daldali doonaa. Wuu ka xanaaqi doonaa maxaa yeelay mid ka mid ah qoyskooda ayaa dhintay, sidoo kale!”

Roomiyo wuxuu ogaaday in uu dhibaato weyn dhexda ugu jiro wuuna cararay intuu carari karayay. Dad kamida dadkii arkay dagaalkii Markishiyo iyo Taybal ayaa u cararay boqorka una sheegay waxa dhacay. Warkii si dhakhso ah ayuu u faafay. Si deg deg ah Kaabulat iyo Montiguyugu waxay ogaadeen dilka Markishiyo. Dhammaantood way yimaadeen si ay u ogaadaan waxa dhacay.

“Yaa bilaabay dagaalka?” boqorkii ayaa weydiiyay. “Taybal,” Benfaaliyo ayaa ku jawaabay. “Wuxuu dilay Markishiyo kadibna Roomiyo ayaa dilay!”

Kaabulatku aad bay u xanaaqsanaayeen waxayna ku yidhaahdeen boqorka waa in aad del deshaa Roomiyo. Benfaaliyo wuxuu u sheegay boqorka in uu Roomiyo isku dayay in uu joojiyo dagaalka. “Eeg,” Benfaaliyo ayaa ku andacooday, “Roomiyo wuu saxsanaa. Kamuu xanaaqin Taybal ilaa inta uu ka dhimanayay Markishiyo. Maan awoodayn in aan kala joojiyo ilaa Taybal la dilay. Kadib Roomiyo wuu cararay. Saasay wax u dhaceen.”

Xaaskii Kaabulat may rumaysan. ‘’Isagu waa Montigiyu,” sidaasi ayay tidhi. “Dabcan wuxuu eedda saari doonaa miiskiinkii Taybal. Roomiyo ayaa dilay Taybal, sidaa darteed waan in Roomiyo la del delaa!”

“Roomiyo ayaa dilay Taybal,” boqorkii ayaa yidhi, “laakiin Taybal sidoo kale wuxuu dilay Markishiyo.”

“Sidaa darteed Roomiyo wuxuu qabtay waxaad qaban lahayd, boqorow. Wuxuu dilay ninkii dilay Markishiyo” Montigiyuga ayaa isku difaacay.

“Taasi waa run,” boqorkii ayaa ku raacay, “Iaakiin isagu maaha boqorka. Roomiyo waa in laga mustaafiriyaa Feroona! Ayaa lagu ciqaabay. Haddii uu dib u soo noqdo, cidna waxba ka waydiin maayo. Waan del deli doonaa!”

## Isagu Dib usoo Noqon Maayo!

Kadib guurkii qarsoodiga ahaa Juuliyat waxay tagtay gurigoogii, waxayna sugaysay habeenka si uu u imaado. Roomiyo wuxuu u balanqaaday inuu u iman doono soona booqan doono habeenkaa.

Waxay ahayd galab dheer. Way sii dheeratay oo sii dheeratay. Waxay sawiratay say u eekaan lahayd markay Roomiyo xaaskiisa noqoto. Maxay saacadu aayar la socotaa? Waxay ahayd maalin ka gaabinaysa maalmaha kale. “Dhakhso, saacadaeey!” Ayay tidhi. “Waan hubaa inaad intaa ka dheerayn karto! Markastood dheerayso, waa markastoo ninkaygu hore u imaado iyo markastoon hore u farxayo.”

Qolka ayay dhex socsocotay. Way fadhiisatay. Qolka ayay mar kale iska dhex socsocotay. Way fadhiisatay mar kale. Wakhtigu hore umuu socon. Muxuu mugdigu u iman laayahay?

Qolka ayay dhex socsocotay markay usoo gashay barbaarisadu oo sida salaankii xadhiga ahaa ee uu Roomiyo habeenkaa isticmaalayay. Si kasta ha ahaatee, waxay u muuqatay mid murugaysan. “Waakan salaankii xadhiga ahaa ee Roomiyo,” ayay tidhi, wali waxay u muuqatay mid murugaysan. Juuliyat way wer wersanayd. “Waa maxay warku? Maxaad aad ula murugaysantahay?” “Waa war dhibaato leh!” Barbaarisadii ayaa si naxdin leh u tidhi. “Wuu dhintay. Wuu dhintay. Waa maalin dhibaato leh! Wuu tagay! Waa la dilay! Wuu dhintay” Juuliyat dirqi ayay ku neefsanaysay. “Waa maxay barbaariso? Yaa dhintay?” “Alla, Roomiyo, cid kale may filayn!” “Maxaa dhacay?” Juuliyat ayaa ku qaylisay. “Ma Roomiyo ayaa is dilay? Kaliyaata dheh ‘haa’ ama ‘maya’, aan ogaadee!”

“Waxaan arkay dhaawacyada ku yaal laabtiisa. Waxaan arkay maydka. Waxaan ku arkay indhahayga. Waxay ahayd dhibaato! Waan xanuunsaday!”

Juuliyat waxay ogayd inaanay waligeed mar kale farxi doonin. Roomiyaheegii, ninkeedii, wuu dhintay! Waxay bilowday inay ooydo, “Alla, Roomiyoow! Alla, Roomiyoow!”

Barbaarisaduna waxay bilowday inay ooydo, “Alla, Taybaloow, Alla, taybaloow waligay umaan malayneyn inaan ku arki doono adoo mayda!” “Maxay? Muu dhintay inaadeerkaygii aan jeclaa ee Taybal sidoo kale? Ninkaygii iyo inaadeerkay labaduba may dhinteen? Waa dhamaadkii aduunka!”

“Maya, maya,” Barbaarisadii ayaa tidhi. “Roomiyo muu dhiman. Taybal ayaa dhintay, Roomiyaana dilay. Roomiyo waxa lagu ciqaabay in laga mustaafuriyo Feroona.”

Inyar gudaheed, Juuliyat way xanaaqday. “Wuu i jecelyahay. Waan jecelahay. Dabeeto wuxuu dilayaa inaadeerkay! Wuu quruxbadan yahay, laakiin waa qof xun.”

Markii ay barbaarisadii ku raacday, si kasta ha ahaatee, waxay ku xanaaqday barbaarisadii. “Ha odhan ninkaagu wa qof xun!”

Waxay la yaaabtay sababta Roomiyo u dilay inaadeerkeed waxayna go’aansatay in uu Taybal dili lahaa isaga hadaanu dilin. Tani way farxad galisay inuu Roomiyo noolyahay, laakiin waxay xasuusatay inuu ciqaaban yahay waxayna bilowday inay mar labaad u ooydo.

“Meeyey hooyaday iyo aabahay?” waxay waydiisay barbaarisadii. “Waxay u tageen si ay u soo tacsiyeeyaan waalidiintii Taybal. Makuu kaxeeyaa halkaa?”

Juuliyat may doonayn in ay aragto maydka Taybal. Iyadu waxa ay ka fikiraysay si ay nafteeda u dili lahayd. Barbaarisadu way u wer-wersanayd iyada waxayna u sheegtay in ay ogtahay in Roomiyo isku qarinayo gurigii Baadari Looransa. Waxay u sheegtay Juuliyat in ay u tagi doonto Roomiyo una sheegi doonto in uu yimaado soona booqdo iyada caawa. Juuliyat way ugu mahad celisay iyada waxayna u dhiibtay fargal si ay Roomiyo u siiso.

“Usheeg ha yimaado si uu u yidhaahdo sagootintiisii ugu danbeysay caawa.”

Roomiyo aad buu uga baqayey in guriga tago. Wuxuu dilay Taybal, waxaanu ogaa in uu boqorku del deli doono haddii uu arko. Saaxiibkii Markishiyo wuu dhintay, sidoo kale. Waa maxay maalintan arooska ah ee xumi! Muu arki doonaa Juuliyat mar kale? Wuxuu u cararay xaga waddada Ferona. Talow halkuu tagi doonaa? Halkuu ku badbaadi doonaa? Meesha kaliya ee uu u malaynayay in uu ku badbaado waxay ahayd guriga baadariga. Markuu halkaa tagay, Baadari Looransa wuu maqnaa, wuxuu isku qariyay beertiisa ilaayo intuu ka imanayay. Baadari Looraansa wuxuu u sheegay wuxuu yidhi boqorku. “Aad buu kuugu naxariistay maxaa yeelay muu amrin in lagu del delo. Kaliyaata wuu ku ciqaabay. Aad ayad u nasiib badan tahay.”

“In lay ciqaab ayaa ka xun in aan dhinto!” Roomiyo ayaa ku baroortay. Baadari Looraansa kumuu raacin. “Adduunkani wuu weyn yahay, ballaadhan yahay, waxaad bilaabi kartaa nolol kale.”

“Majirto nolol aan Ferona ahayn,” Roomiyo ayaa ku ooyay. “In lagaa ciqaabo Ferona waxay lamid tahay in lagaa ciqaabay adduunka. Waa dhimishadoo kale. Juuliyat ayaa halkan ku nool, bisad kastaa iyo ey kastaa wuu arki karaa iyada, laakiin anigu ma arki karo. Dukhsi kastaa wuu taaban karaa gacanteeda, laakiin anigu ma taaban karo. Sided u odhan kartaa waad nasiib badan tahay? Waxaad i siisaa waxoogaa dhiroo suna aan dhintee!" Baadarigii waynaa wuxuu isku dayay inuu Roomiyo dajiyo, laakiin Roomiyo muu dhagaysan. “Sideed u fahmi kartaa? Hadii aad yaraan lahayd sidaydoo kale, oo aad Juuliyat jeclaan lahayd saan u jecelahoo kale, hadii aad saacad ka hor soo guursan lahayd, hadii aad dili lahayd Taybal, hadii uu ku ciqaabi lahaa boqorku, ayaad fahmi lahayd.” Roomiyo dhulka ayuu ku dhacay oo uu jiifay isagoo ooyaya Baadarigii wuxuu u sheegay inuu kaco, laakiin muu awooodeyn. Dabeeto albaabka ayaa lasoo garaacay. “hadii ay cid halkan kugu aragto way ku dilidoontaa,” Waxaa ugu digay Baadari Looransa. “Waxa wanaagsan inaad qol kale isku qariso!” Roomiyo muu danayn dhulka ayuu iska sii jiifay. Barbaarisadii ayaa dhawaaqday. “Baadari Looransow, waxaan ahay Juuliyat barbaarisadeedii. Roomiyo muu jogaa?” Baadarigii albaabka ayuu furay wuxuuna u ogolaaday inay soo gasho. Waxay aragtay Roomiyo oo dhulka jiifa oo ooyaya. “waxay tidhi isagu waa sidii Juuliyat oo kale,” ayay u sheegtay Baadariga. “Iyaduna dhulka ayay jiiftaa, oo ay sidii ilma yar u ooyaysaa. Istaag, Roomiyow! Nin iska dhig Juuliyat darteed! Istaag!” Roomiyo wuu maqlay oo wuu istaagay. “Juuliyat waa sidee?” Ayuu waydiiyay. “May igu nacday dilkaan dilay inaadeerkeed? Maxay tidhi?” “Waxba may odhan. Way iska ooyaysaa. Sariirteeda ayay ku dul dhacaysaa oo ay kasoo

kacaysaa oo ay ooyaysaaa mar kale. Waxay ku dhawaaqaysaa ‘Taybalow!’ hadana waxay ku dhawaaqaysaa ‘Roomiyow!’ hadana waxay ku dul dhacaysaa sariirteeda.” Warkani wuxuu ka dhigay Roomiyo mid murugaysan wuxuuna isku dayay inuu midi is galiyo. Barbaarisadii ayaa ka qaaday mididii. Baadarigu wuu xanaaqsanaa. “Waxaad u eegtay nin,” sidaas ayuu yidhi, “laakiin waxaad u oyaysaa sida ciyaalka. Waxaad eeda saaraysaa magacaaga. Waxaad eedaynaysaa adduunka. Waxaad dhaleecaynaysaa wax kasta, dabeeto waad ooyaysaa. Markaad maqashey taa jeclayd in ay murugaysan tahay, ayaad doonaysaa in aad naftaada disho! Siduu dilkaagu u caawinayaa iyada? Waxaad haysataa sababo badan oo aad ku faraxsanaato. Taybal wuxuu doonayay in uu ku dilo, laakiin adaa dilay. Waa inaad faraxsanataa. Boqorku wuu ku del deli karayay, laakiin wuxuu kuu ogalaaday in aad noolaato. Waa in aad faraxdaa. Waxaa jira seddex sababood oo aad ku farxi karto, laakiin waad niyad jabtay. Ma badali kartid waxa dhacay, laakiin waxaad sii wadan kartaa noloshaada. Juuliyat u tag. Oo ka dhig mid faraxsan. Dabeeto waxaad tagtaa Mentuu halkaas oo aad ka heli karto meel aad ku noolaato inta ay Juuliyat kuu imanayso oo ay kula noolaanayso. Waxa laga yaabaa in aad la hadasho boqorka maalinuun oo aad waydiisato in uu kuu ogalaado in aad Ferona ku soo noqoto.”

Wuxuu usoo jeestay barbaarisadii. “Gurigii tag una sheeg Juuliyat in uu Roomiyo u imanayo.”

Barbaarisadu waxay rajaynaysay inay habeenkoo dhan joogto halkan oo ay dhagaysato Baadari Looraansa. Wuxuu siiyay talo wanaagsan! Si kastaba ha ahaatee, waa inay tagtaa. Markii ugu danbaysay, waxay xusuusatay fargalkii ay Juuliyat ugu soo dhiibtay Roomiyo. Roomiyo aad buu ugu farxay in helo fargalka. Dabeeto barbaarisadii waxay ku noqotay gurigii.

## Ballanqaadkii Kaabulat

Barbaarisadii waxay usoo dagdagtay guriga waxayna u diyaarisay Juuliyat buuqashadii Roomiyo.

Roomiyo wuxuu dareemayay farxad badan kadib markuu maqlay taladii Baadariga, wuxuuna u dagdagay Juuliyat si uu u arko. Wuxuu koray gidaarkii beerta kadib wuxuu isticmaalay salaankii xadhiga ahaa si uu ugu soo koro balakoonka qolka Juuliyat. Waa guriga dhexdiisa, Kaabulat iyo xaaskiisu waxay kala hadlayeen Baariis arinta Juuliyat. Baariis wali wuu doonayay guurka Juuliyat.

Midkoodna muu ogayn in ay si qarsoodiya u guursatay Roomiya. Kaabulat wuxuu u sharaxay in ay Juuliyat aad uga murugaysantahay dhimashada Taybal intay ka fikiri lahayd inay guursato. “Way wanaagsanan doontaa maalin ama laba cisho gudahood,” ayuu yidhi. “Aaadbay u jeclayd Taybal. Waxaynu u dhalanay in aynu dhimano, wayna la qabsan doontaa maqnaanshihiisa.” “Bari baan soo heli doonaa waxay ku fikirayso,” Kaabulat xaaskiisii ayaa usoo jeedisay. “Maya, sug,” Kaabulat ayaa yidhi, markuu Baariis sii baxayay. “Way ku guursan doontaa. Waxaan u malaynayaa in la guursada inay ka caawin doonto murugada

dhimashada Taybal. Tani waxay noqon doontaa waxa ugu wanaagsan iyada. Waan hubaa in ay inantaydu ogolaan doonto in ay qaadato taladayda. Aynu samayno aroos yar Salaasada. Waxaynu marti qaadi doonaa waxoogaa kamida saaxiibada. Uma malaynayo in ay tahay in aan samayno aroos weyn iyadoo ay wali taagan tahay dhimashadii Taybal. Maxaad ka odhan lahayd?"

Baariis farxad ayuu la ooyay. "Waxaan rajayn lahaa bari inaan ahaateen Salaasa oo ay noqon lahayd Khamiis!" waxay isku raaceen in uu aroosku dhaco Khamiista, Kaabultna wuxuu u sheegay xaaskiisii in ay diyaariso inantooda.

Roomiyo iyo Juuliyat aad bay ugu faraxsanaayeen in ay habeenkaa wada joogaan. Wax badanba kamay soo wareegin markuu dhulku iftiimay. Si kastaba ha ahaatee, Roomiyo waa in uu ka tagaa xaaskiisa. Juuliyat may doonayn in uu ka tago. "Maaha in aad tagto imika," sidaas ayay tidhi. "Wali waa mugdi." "Waa in aan tagaa Mantuu intaanu dhulku iftiimin," sidaasi ayuu yidhi. "Waanigan arkayaba iftiinka cirka. Haddii uu qof i arko, waxay u sheegi doonaan boqorka. Anigana waa lay del deli doonaa. Ma doonayo in aan tago, laakiin waa khasab in aan tagaa! Haddii aan halkan sii joogo waan dhiman doonaa."

"Maya," Juuliyat ayaa tidhi. "Wali dhulku muu iftiimin. In yar iska sii joog."

"Waa hagaa, waan joogayaa. Waxba igama galin haddii lay dilo, haddii aad adigu doonayso In aan joogo. Anigu waan faraxsanahay. Waxaan doorbidi lahaa inaan halkan joogo intaan tagi lahaa Mantuu. Wax iftiini majiro!"

Tani waxay ka dhigtay Juuliyat mid murugaysan. Waxay eegtay dibada si ay u aragto in uu cirku iftiin leeyahay. Waxa jiray iftiin.

"Haa, haa, wuu jiraa!" Juuliyat ayaa tidhi. "Dhakhso! Waa inaad tagtaa! Wuu soo caddaanayaa!"

Barbaarisadii Juuliyat ayaa soo gashay qolka una sheegtay inay hooyadeed soo socoto si ay iyada u aragto. Juuliyat waxay la yaabtay sababtay hooyadeed xiligan hore lasoo jeedo. Roomiyo iyo Juuliyat markii ugu danbaysay way isasii dhunkadeen. Wayna isa sii macasalaameeyeen. Roomiyo iyo Juuliyat waxay isku balanqaadeen inay isku soo diraan fariimo maalin kasta. Aadbay u adkeyd in ay is macasalaameeyaan lakiin ugu danbayntii Roomiyo wuxuu ku daan dagay salaankii xadhiga ahaa beertaanu tagay. Isla markii uu cagahiisu dhulka taabteen ayay Juuliyat hooyadeed soo gashay qolka.

"Sideed tahay, Juuliyat?" Ayay waydiisay. "Ma wanaagsani, hooyo," Juuliyat ayaa ku jawaabtay.

"Wali ma waxaad la ooyaysaa dhimashadii inaadeerkaa? Ooyintu isaga kusoo celin mayso isaga. Waxaan u malaynayaa in aad joojin doonto. Murugada qaaarkeed waxay ku tusaysaa jaceyl. Laakiin murugada saa usii badan waa nacasnimo." Juuliyat hoooyadeed waxay u malaynaysay inay la ooyayso maxaa yeelay Roomiyo, in ninkii dilay inaadeerkeed, inuu wali nool yahay.

Juuliyat waa in ay iska dhigtaa inay tani runtahay. May dooneyn inay cidi ogaato in Roomiyo ninkeeda yahay uu habeenkaasna qolkeeda joogay. Waxa laga yaaba in ay qabtaan oo ay daldalaan!

“Ha werwerin,” hooyadeed ayaa tidhi. “Waan ogohay in uu Roomiyo joogo Mantuu.” Waxaynu u diri calooshiisa u shaqayste Mantuu. Calooshiisa u shaqaystuhu wuu dili doonaa Roomiyo taasina waxay ahaan doontaa dhamaadka Roomiyo! Ka dib mar labaad ayaad farxi doontaa. Juuliyat si dhakhso ah ayay uga fikirtay qorshe ay ku badbaadiso Roomiyo. “Hooyo, ma faraxsanaan doono ilaa aan anigu Roomiyo ka aarsado. idaa aan dilee.waxaan soo heli dooonaa waxoogaa suna waxaanan u dhiibi doonaa calooshiisa u shaqaysataha, isna wuxuu siin doonaa Roomiyo.”

May dooneyn inay isticmaasho sun dhaba. Waxay rajaynaysay hadii ay hooyadeed u malayn lahayd in Roomiyo dhintay, waxay joojin lahayd isku daygeeda dilka. “Taas hadhowbaan ka wada hadli doonaa, lakiin imika waxaan kuu sidaa war wanaagsan,” hooyadeed ayaa tidhi. “Waxay tidhi waad ogtahay in markasta aabahaa ku daryeeli jiray. Kaliyaata wuxuu kula doonayaa wax adiga kuu wanaagsan. wuxuu la qaatay in aroornimada Salaasada in kiniisada San Biitar aad ku guursan doonto Baariis. Aabahaa wuxuu aaminsan yahay in aad ilowdo murugada Taybal si dhakhso ah. Aniga iyo aabahaaba waxaanu ognahay inuu kaa dhigi doono xaas faraxsan.” “Alla, maya, igama dhigi doono!” ayay ku jawaabtay. “Aad ayay u dhaweyd dhimashadii Taybal sideen u guursadaa. Maxaynu sidan ula degdegaynaa? Usheeg aabahay in aanan wali guursanayn anigu. Ma jecli Baariis. Xataa isagu imuu waydiin. Waxaan door bidi lahaa in aan Roomiyo guursado, waanad ogtahay intaan necebahay isaga!” Markuu Kaabulat maqlay inay Juuliyat diiday guurka Baariis, aad iyo aad iyo aadbuu u xanaaqay.

Juuliyat ayuu u yeedhay wuxuuna u sheegay inay tahay inan bilaa abaala. Wuu ku qayliyay. Wuxuu u sheegay in ay ka farxiso aabaheedii soo barbaariyay hubsatana inay xaas wanaagsan leedahay. Mar labaad ayuu ku qayliyay. Wuxuu ugu yeedhay magacyo xun xun. Wuxuu u sheegay hadii aanay Baariis guursan khamiista in aanu waligeed dib ula hadli doonin. Dhag umuu dhigayn hadalkeeda aadbuu u cadhaysnaa! Barbaarisadii ayaa isku dayday inay isaga la hadasho, lakiin waxa uu u sheegay inay aamusnaato. “Ma aaminsana waxay ku hadlayso!” ayuu ku yidhi xaaskiisii. “Waynu soo korinay ilaa maalintay dhalatay. Waxaynu daryeelaynay habeen iyo maalin sanad ilaa sanad. Imika waxaynu u helnay nin wanaagsan. waa taajir. Wuxuu kasoo jeedaaa qoys wanaagsan. isagu waa mid naxariis leh wuu quruxbadan yahay. Wuxuu leeyahay wax kastoo inan dooni lahayd, lakiin inantaa nuxuusta ah waxay leedahay, ‘maya, waad mahadsantahay. diyaar uma ihi inan guursado! Ma jeclaan karo. Aad baan u yarahay.’” “Dhagayso, ” ayuu ku idhi inantiisa, “Hadaanad Baariis guursan gurigan ku noolan maysid. Anigu kuma daryeeli doono. hadad inantaydii tahay Baariis ayaad guursan doontaa. Hadaanad ahayna, waxaad ku noolan kartaa wadooyinka xagaasanad gaajo ugu dhiman! Ka fikir! Waxaad haysataa ilaa khamiista.” “Fadlan, hooyo! i caawi!” Juuliyat ayaa ku ooyday. “Ma guursan karo isaga! Muuna sugi Karin bil ama xataa todobaad?” Si kasta ha ahaatee hooyadeed may dhagaysan qolkayna kaga baxday Juuliyat iyo aabaheed.

“Maxaan sameeyaa? Maxaan sameeyaa?” Juuliyat ayaa ku ooyday. Qofka kaliya ee wax ka dhagaysanayay waxay ahayd barbaarisadeeda.

## Hurdadii Dheerayd ee Juuliyat

Barbaarisadu may ahayn qof indheer garad ah. Si kastaba ha ahaatee, waxay ka fikirtay in ay hayso fikrad fiican. May fahmin waxay Juuliyat la murugaysayn iyo waxa ay la ooyayso. Jawaabtu waxay ula muuqatay mid fudud.

“Eeg,” sidaasi ayay tidhi, “Roomiyo waa la ciqaabay, dibna uma soo noqonayo. Haddii uu soo noqdo waa la dili doona. Sidaa darteed waa inaad ilawdaa Roomiyo. Cidna ma oga in aad adigu guurstay, haddii aanad cidna u sheegin, cidna ma ogaan doonto. Sidaa darteed, waxa ugu fiican ee aad samayn kartaa waa inaad baariis guursataa. Isagu aad ayuu u qurux badan yahay waana taajir. Waa mid ka qoyska boqorka. Waxaan umalaynayaa in uu noqon doono xaas wanaagsan. sidaa darteed waa in aad gabi ahaanba ilawdaa Roomiyo guursataana Baariis. Taasi way fududahay!”

“Ma sidaa ayaad u jeedaa?” Juuliyat ayaa waydiisay. “Haa, dabcan,” barbaarisadii ayaa ugu jawaabtay. Juuliyat si deg deg ah ayay u fikirtay waxayna iska dhigtay mid ku raacday. “Waxaan umalaynayaa in aad saxsan tahay,” sidaasi ayay tidhi. “Taasi waa talo wanaagsan. utag oo u sheeg hooyaday in aan ka xumahay in aan aabahay ka cadhaysiiyay. Waxaan tagi doonaa kiniisadda waxaana la soo hadli doonaa baadariga.”

Juuliyat fikradeedu waxay ahayd in ay utagto baadariga waydiisana taladiisa. Haddii aanu isaga yada caawin waxay ku fikirtay in ay is dili doonto. Isla wakhtigaa, Baariis waxuu kala hadlayay baadariga arooska Khamiista. Baadari Looraansa wuu ogaa in Juuliyat aroos si qarsoodiya u guurstay Roomiyo, laakiin muu doonayn in uu u sheego Baariis. Waxuu u sheegay in Khamiistu aad u dhawdahay Baariisna uuna haysan ogolaanshaha Juuliyat. Baariis wuxuu u sheegay in Kaabulat doonayo in uu aroosku si deg deg ah u dhaco waayo wuxuu ka fikirayay in ay taasi Juuliyat ka caawin doonto in ay joojiso ka fikirida dhimashadii Taybal.

Iyagoo wada hadlaya Juuliyat ayaa timid. Baariis wuxuu kala hadlay arooska. wuu dhunkaday wuxuuna ugu yeedhay xaaskiisa, laakiin Juuliyat may dhoolacadayn. Waxay waydiisatay in ay la hadli karto kaligeed. Markuu Baariis tagay, Juuliyat waxay weydiisay inay jirto hab lagu joojin karo arooska. “Haddii aanad adigu caawin, anaa is caawinaya,” sidaasi ayay tidhi. Mindi ayay gosha ka soo baxday waxayna ku qabatay laabteeda. Baadari Looraansa ayaa ka qaaday mindida, wuxuuna u sheegay in uu caawin doono haddii ay dhiiran tahay.

“Anigu wax walba waan samaynayaa oo aan ahayn guurka Baariis,” ayay tidhi. “Waan hubaa in aan dhiiranahay in igu filan! Masaska ayaan la seexan karaa ama jiifsan karaa xabaalaha dadka dhintay. Iisheeg maxaa sameeyaa, waan samaynayaa!”

Baadari Looraansa wuxuu kula taliyay in ay guriga tagto ogolaatana guurka Baariis qof walbana u dhego nuglaato. Intaa kadib waxa uu siiyay caagad yar oo ay ku jiraan dawooyin

dhir ah waxaanu u sheegay in ay in kamida cabto habeenka Arbacada, habeenka ka horeeya arooska.

“Hurda dheer baad geli doontaa,” ayuu yidhi, “laakiin way ka duwan tahay noocyada hurdada. Waxaad joojin doontaa neefta. Waxaad noqon doontaa sidii qof dhintay. Maalinta Khamiista way kuu iman doonaan si ay kuugu toosiyaan arooska, laakiin waxay u malayn doonaan inaad dhimatay. Waxaan sidaa ahaan doontaa laba iyo afartan saacadood, dabadeed waad kici doontaa. Isla xiligaa waalidka waxay ku dhinac dhigi doonaan xabaashii awowyaashaa. Waxaan u qori doonaan waraaq Roomiyo una sheegi doonaa waxaan sameynay. Wuu iman doonaa xabaasha, isagoo ku sugaya ayaad soo kici doontaa, dabeeto wuxuu kuu kaxayn doonaa Mantuu. Halkaa ayaad ku badbaadi doontaa. Cidna ku doondooni mayso waayo waxa loo malaynayaa in aad dhimatay.”

Juuliyat aadbay ugu faraxday fikradan waxayna qaadatay caagadii dawadu ku jirtay. Aabaheed wuxuu ku mashquulsanaa diyaarinta arooska. Waxay u sheegtay in ay aad uga xuntahay in aan ay isaga dhegaysan kana soo horjeesatay hadalkiisa. Waxay tidhi waxaan samayn doonaa waxaad rabtid. “Waxaan guursan doonaa Baariis,” ayay tidhi.

Barbaarisadii waxay qol la seexan jirtay Juuliyat, si hadii ay wax u baahato habeenkii oo kale ay u siiso. Habeenkii arbacada, si kasta ha ahaatee, Juuliyat waxay u sheegtay barbaarisadii in ay meel kale seexato. Waxay doonaysay inay habeenkaa kali ahaato arooskeega ka hor. Barbaarisadu waxay ka caawisay in ay dharkeeda u diyaariso dabadeeto qolka ayay ugu tagtay kaligeed. Juuliyat waxay ka wer wersanayd in daawada baadarigu soo siiyay shaqayn waydo. Waxay sariirteeda ag dhigtay midi si hadii ay aroortoo kale soo kacdo ay noqoto inay Baariis guursato si ay u isticmaasho si ay iskugu disho. Waxa jira waxyaabo badan oo laga wer wero. Bal kawaran hadii uu baadarigu soo siiyay iyada sun dhaba? miyay rumaysan lahayd? Maxaa dhici lahaa hadii ay hore usoo kacdo? Miyay ka heli lahayd xabaasha hawo ku filan? Kadib waxay xasuusatay in inaadeerkeedii dhintay ee Taybal uu xabaasha ku jiro, soidoo kale.xataa waxay ka wer wersanayd rooxaamaha.

“Waa in aan dhiiranaadaa,” ayay tidhi. “Roomiyo wuu iman doonaa!” waxay qaadatay caagadii yarayd ee ay ku jirtay dawadu waanay cabtay. Waxay jiifsatay sariirta isla markiina way gama’day.

Aroortii xigtay Kaabulatiska iyo shaqaalahoogu xili hore ayay soo jeedeen. Waxyaabo badan baa jira oo la qabanayo arooska ka hor. Qofkastaa wuu mashquulsanaa wuuna ku faraxsanaa arooska.

Cunta kariyayaashu waxay samaynayeen cuntooyin khaasa, shaqaaluhuna waxay nadiifinayeen guriga una diyaarinayeen martidii u iman lahayd. Qofkastaa wuu kaftamayay wuuna qoslayay.

Waxay ahayd maalin farxadeed. Kadib waxa yimid Baariis. Kaabulat ayaa salaamay uguna yeedhay inankiisiiyoo kale. “Soo dhawoow, inankaygiiyow! Kusoo dhawoow gurigayaga iyo xaaskaaga. Kamay soo bixin qolkeedii wali. Barbaariso! Usheeg Juuliyat inay soo daandagto kuna tidhaahdo aroor wanaagsan odaygeeda” Barbaarisadii waxay tagtay qolkii Juuliyat

waxayna si hoose ugu yeedhay magaceegii. Tani way ugu filnayd inay ku toosto lakiin, markan kumay toosin. Barbaarisadii si sare ayay ugu dhawaaqday lakiin Juuliyat wali way sii huruday. Ugu danbayntii, si toosa ayay ugu tagtay sariirta waxayna riixriixday Juuliyat. Juuliyat may dhaqaaqin Barbaarisadiina waxay ogaatay inay dhimatay. Waxay u qaylisay si xooga. Juuliyat hooyadeed ayaa timid iyadoo cararaysa, “Maxaa dhacay? Maxaa dhacay?” Barbaarisadii may hadli karayn. Waxay gacanta ku fiiqday Juuliyat oo jiifta sariirteeda. Si degdega, Hooyadeed waxay u ogaatay in ay inanteedii dhimatay.

“Ilmahaygiiyeey! Inantaydiiyeey! Juuliyadaydii quruxda badnaydeey! Toos! Toos, ama waan kula dhiman doonaa. I caawiyaay! I caawiyaay!” Juuliyat aabaheed ayaa soo galay qolka. “Soo dhakhso, Juuliyadeey! Xaaskaagii ayaa ku sugaya si uu kuu arko!” “Way dhimatay!” xaaskiisii ayaa tidhi iyadoo ooyaysa. “Way dhimatay!” barbaarisadii ayaa tidhi iyadoo ooyaysa. Kaabulat ayaa eegay inantiisa iyadoo jiifta sariirta. Wajigeegu wax midaba muu lahayn manayna neefsanayn. “way dhimatay!” Kaabulat ayaa yidhi isagoo ooyaya.

Baariis iyo Baadari Looransa ayaa yimid qolkii, sidoo kale. “Juuliyat ma diyaarbaa si ay u tagto kiniisada?” waxa waydiiiyay Baadarigii. “Haa,” aabaheed ayaa yidhi, “Lakiin kama soo noqonayso waligeed. Baariisow, inantaydii way dhimatay. Xaaskaagii way dhimatay.” Dhamaantood waxay bilaabeen in ay ooyaan. Midna muu doonayn inuu rumaysto in Juuliyat dhimatay, dhimatayna maalintii arooskeeda. Kaliyaata waxa ogaa Baadariga sirta Juuliyat. Wuxuu ahaa qofka kaliya ee og in aanay dhiman. Si yaroo qabow ayuu u hadlay una sheegay dhamaantood waxay samayn lahaayeen.

Dhamaantood way dhagaysteen isaga waxayna bilaabeen inay diyaariyaan aaska. Maalintii farxada, mashquulka, kaftanka iyo qosolka badnayd way is badashay. imika waxa weeye maalintii ugu murugada badneyd ee waligood soo marta, waxayna ahayd maalin oohin iyo wada ilmo miidhana.

## Soo Noqoshadii Roomiyo ee Ferona

Roomiyo wuxuu joogay Mantu. Kumuu faraxsanayn in uu halkaa joogo. Wuxuu doorbiday in uu la joogo Ferona qoykooda iyo Juuliyat, laakiin muu awoodayn in uu tago. Waxa ciqaabay boqorka kadib markii uu dilay Taybal waanu del deli doona haddii uu dib usoo noqdo. Wuxuu si bilaa samir ah u sugayay warka Juuliyat. Baadari Looransa wuxuu u ballanqaaday inuu u soo diri doono dhambaalside. Dhambaalsiduhu wuxuu imandoonaa Khamiista, laakiin kama iman doono baadariga. Wuxuu ahaa mid ka mid ah Roomiyo saaxiibadii kaas oo soo arkay aaskii Juuliyat. Wuxuu tagay Mantuu isagoo deg degaya inta uu karo si uu ugu sheego Roomiyo dhimashada Juuliyat.

Roomiyo muu agoyn dawada uu siiyay baadarigu Juuliyat. Wuxuu rumaystay in ay Juuliyat dhimatay. Wuxuu u meeraystay sidii qof waalan, ooyay oo qayliyay. Dabeeto wuxuu soo qabtay faras wuxuuna u deg degay Ferona. Wuxuu ogaa Juuliyat in uu dib usoo nolaynayn markale, laakiin waalidiisa wuxuu go’aansaday in uu xabaasheeda dhinaceeda jiifsado wuxuuna soo qaatay waxooga sun ah. Dabeeto way wada jiri doonaan dhimashada ka bacdi.

Wuxuu istaagay gurigii dhakhtarka kaas oo iibiya dawooyin wuxuuna waydiistay waxoogaa sun ah. Markii koowaad dhakhtarku kamuu iibin isaga maxaa yeelay waxay ahayd mid ka baxsan sharciga Mantu. Si kasta ha ahaatee, muu ahayn dhakhtar lacag leh, markuu uu Roomiyo siiyay lacag badan wuu siiyay suntii.

"Waa sun xoogbadan," ayuu yidhi. "Waxa ku dartaa cabitaanka waxayna kuu dili doontaa si deg deg ah."

Roomiyoo wuu qaatay caagadii wuuna sii watay socodkiisii Ferona. Waxbaa qaldanaa. Baadari Looransa wuxuu doonayay in uu u diro dhambaal Roomiyo si uu ugu sheego in aanay Juuliyat runtii dhiman. Mee dhambaal qaadihii? Aad ayay muhiim u ahayd inuu Roomiyo helo fariintan. Haddii kale, ma ogaan doono in ay Juuliyat si run ah u dhiman. Muu helin fariintii, imikana wuxuu soo iibsaday waxoogaa sun ah. Wuxuu qorshaynayay in uu is dilo maxaa yeelay wuxuu u maleeyay in ay Juuliyat dhimatay.

Baadari Looraansa wuxuu u dhiibay fariintii nin la yidhaa Baadari Joon. Baadari Joon wuxuu sii maray nin ay saaxib yihiin si uu soo booqdo inta uu waddada sii socday. Saaxiibkii aad ayuu u xanuusanayay dadkuna waxay ka baqayeen in Baadari Joon uu xanuunka usii qaado Mantuu. Umay ogolaan in uu tago magaalda Mantu. Xataa kamay qaadin waraaqdii fariinta, Baadari Joona waa in uu kula soo noqdaa waraaqda Ferona. Wuxuu u soo celiyay Baadari Looransa.

"Waan ka xumahay," ayuu yidhi, "laakiin maan awoodin in aan siiyo Roomiyo." Baadari Looransa wuxuu ogaa in uu ahaa war xun, laakiin runtii muu wer werayn. "Juuliyat waxay ku kici doontaa seddex saacadood gudahood," ayuu ku fikiray. "Waxaan haystaa wakhti aan ku nasto xabaasha kuna sugo iyada waayo Roomiyo halkaa ma joogi doono, wayna biqi doontaa. Waxaan u kaxayn doonaa gurigeyga xalkasanan ku qarin doonaa. Waraaq kale ayaan Roomiyo u qooridoonaa wuuna u iman doonaa." Baadari looransa, si kasta ha ahaatee, muu ahayn ka kaliyaatee tagaya xabaasha habeenkaa. Baariis aad buu uga murugaysnaa dhimashada Juuliyat. Muu ogayn inanayay Juuliyat jeclayn isaga ayna doonayn inay guursato. Wuxuu keenayay waxoogaa ubaxyo ah si uu u dhigo xabaasha. Markuu dhigayay ubaxyada, wuxuu maqlay qaylo wuxuuna u maleeyay inuu qof kale soo socdo wuxuu isku qariyay geed dabadii wuxuuna arkay laba nin oo usoo socda dhinaca xabaasha.

Markay soo dhawaadeen, wuxuu aqoonsaday in Roomiyo iyo adegihiisi yihiin. Baariis wuu eegayay markii Roomiyo iyo adeegihiisu ay imanayeen xabaasha. Roomiyo wuxuu u dhiibay adeegihiisii waraaq. "Waxaad siisaa waraaqdan aabahay bari aroorta hore," ayuu yidhi. "Waan jabinayaa xabaasha. Hay joojinin. Sabab wanaagsan oon u jabiyo ayaan haystaa. Waxaan doonayaa in aan wajigeega arko mar kale, waxaanan doonayaa in aan fargal gacanta u galiyo. Hoo waxoogagan lacagta ah. Tag, oo hasoo noqonin. Hadii aad soo noqoto, waan ku dili doonaa. Saw maad fahmin?"

Adeegihii wuxuu yidhi waan fahmay. Wuxuu ka baqayay inuu xabaasha ag joogo habeenimada, sidoo kale wuxuu ka baqayay Roomiyo. Si kasta ha ahaatee, wuxuu doonayay inuu ogaado wuxuu Roomiyo sameeyo wuxuuna isku daba qariyay geed. Roomiyo wuxuu bilaabay inuu jabiyo xabaasha.

Baariis wuxuu ka daawanayay geed dabadii, wuu fajacay. “Kani waa mantiigii dilay jacaylkayga inaadeerkeed! Juuliyat waxay ka murugaysnayd dhimashada Taybal tani waxay sababtay inay dhimato, sidoo kale! imika wuu soo noqday wuxuuna doonayaa inuu xabaasheeda galo. Muxuu xagaa ka qabanayaa? Waa in aan joojiyaa isaga!” Wuxuu lasoo baxay seeftiisii wuxuuna kasoo daba dhaqaaqay geedka dabadiisii. “istaag, Mantiigyahow!” ayuu kusoo qayliyay. “Maxaad u malaynaysaa in aad xagaa ka qabanayso? Waa lagu ciqaabay! Laguuma ogola in aad xagan joogto. Isoo raac. Waxaan kuu gayn doonaa boqorkee. Wuu ku daldalidoonaa, waanad dhiman doontaa!”

“Waad saxsantahay,” Roomiyo ayaa yidhi. “Waan dhiman doonaa. Taas ayaad ku wanaagsanan doontaa adigu, si kasta ha ahaatee, iskagakay tag. Haygu kalifin in aan kula dagaalamo. Juuliyat naftaydaan ka jecelahay. Orodoo iskaga kay tag!”

Baariis, si kasta ha ahaatee, muu tagin. Wuxuu doonay inuu Roomiyo u kaxeeyo boqorka wuxuuna ku weeraray seeftiisii. Roomiyo wuxuu la soo baxay seeftiisii wayna dagaalameen. Baariis dhulka ayuu ku dhacay markuu Roomiyo ku dhuftay seeftiisa. Si xun ayaa uu u dhaawacmay wuxuuna ogaaday in uu dhimanayo. “Xabaasha Juuliyat ila dhig” ayuu yidhi. “Waan ku dhigi doonaa,” Roomiyo ayaa u balan qaaday, Baariisna wuu dhintay.

## Go’aankii Roomiyo iyo Juuliyat

Roomiyo wuxuu jabiyay xabaashii wuxuuna u qaaday Baariis xabaashii. Wuxuu arkay Juuliyat, oo wali qurux badan sidii uu ku ogaa. May fogayn, wuxuu arkay Taybal, Juuliyat inaadeerkeed, oo isagu dilay. Isaguna sidoo kale wuxuu jiifsanayay xabaasha. Muu garanayn maxay wali Juuliyat la qurux badantahay. Muu malaysan in ay Juuliyat wali nooshahay una kici doonto si deg deg ah. Wuxuu soo qaaday gacanteedii wuuna dhunkaday. Dabeeto wuxuu ku shubay suntii koob wuuna cabay. Dabeeto markale ayuu dhunkaday Juuliyat dhulkuuna ku dhacay. Suntu aad ayay u awood badnayd Roomiyoona wuxuu u dhintay si deg deg ah. Haddii in yar sugu lahaa!

Saacad badhkeed ka bacdi waxa yimi xabaasha Baadari Looransa wuxuuna dibada ku arkay adeegihii Roomiyo. “Maxaad halkan ka qabanaysaa?” ayuu waydiiyay adeegiihii. “Waxaan ka arkaa iftiin xabaalaha Kaabulatka. Yaa halkaa jooga?” “Waa Roomiyo,” adeegihii ayaa ku jawaabay. “Wuxuu halkaa joogay saacad iyo badh. Ma garanayo wuxuu qabanayo.”

“Iisoo raac xabaash,” Baadari Looransa ayaa yidhi. “Maya. Aad ayaan u baqayaa,” adeegihii ayaa ku jawaabay. “Roomiyo ma oga inaan halkan joogo. Wuxuu ii sheegay inaan tago. Wuxuu ii sheegay in uu i dili doono haddaan soo noqdo.”

Sidaa darteed Baadari Looransa kaligii ayuu xabaasha tagay. Meel u dhaw halka laga galo xabaalaha, wuxuu ku arkay seefo dhulka yaal halkaas oo ay Roomiyo iyo Baariis ka tageen. Sidoo kale dhiig ayaa dhulka ku daadsanaa. Tani waxay ka dhigtay mid wer wersan. Wuxuu tagay xabaashii wuxuuna arkay Roomiyo iyo Baariis oo maydkoodu yaalo dhulka. Baadari

Looransa muu rumaysan. Maxaa dhacay! Side labadan nin ee yari ay ugu dhinteen xaabaasha, maxayna u dhinteen? Tani waxay ka dhigtay mid aad u murugaysan.

Intaa uu eegayay meedadkii wuxuu maqlay qaylo. Wuxuu ahayd cod gabadh yar. Wuxuu eegay Juuliyat wuxuuna arkay iyadoo soo kacaysa. Way aragtay. “Baadari wanaagsan,” ayay tidhi, “May xaaskaygii? Waxaan sameeyay waxaad ii sheegtay inaan sameeyo, imikana waan soo kacay. Dawadaadii way shaqaysay. Mee Roomiyo?”

“Miiskiintaydi yaraydeey, Juuliyadaydi miiskanta ahaydeey!” ayuu ku qaylyay baadarigii. “Waxbaa qaldamay! Qorsheheenii muu shaqayn. Xaaskaagii halkan ayuu joogaa, laakiin wuu dhintay! Inaga mari meeshan xun. Waan kaa kaxayn doonaa halkan waanan ku qarin doonaa. Masii joogi karno halkan, waxaan maqlayaa ilaaladii oo soo socota, ina dedeji!”

“Waad tegi kartaa!” Juuliyat ayaa ku qayliday. “Kama tagayo xaaskayga!”

Waxay aragtay in uu Roomiyo haysto koob waxaana qiyaastay in uu isku dilay sun. koobku wuu madhnaa, laakiin waxay galisay afka. Waxay rajaynaysay in ay ku sumoobi doonto, sidoo kale. si kasta ha ahaatee, ilaaladii ayaa soo dhawaatay. May maqlayn intay soo socdeen. May sugin in ay u shaqayso suntu. Waxay soo qaadatay mindi waanay is dishay. Markay ilaaladii timi may rumaysan waxay arkeen. Waxay ahayd Juuliyat, taas oo mootanayd laba cisho, dhiigbaa ka socday dibna way u dhimatay. Waxa yaalay ninkay guursanaysay, oo maydkiisu dhulka yaal. Waxa yaalay Roomiyo kaas oo dilay Taybal, isna sidoo kale maydkiisu dhulka yaalo. Maxaa dhacay? Taliyihii ilaaladu wuxuu u diray fariimo boqorkii, Kaabulat iyo Montigiyuu. Inatay sugayeen imaanshahooga, waxay arkeen adeegihii Roomiyo oo isku daba qarinaya geed. Sidoo kale waxay arkeen baadari Looransa, wayna isku xidheen labadoodii. Boqorka ayaa markii hore yimi, intuu ogaan waxa dhacay, Kaabulat iyo xaaskiisa ayaa yimi. Qof walbaa wuu qaylyay, qaar waxay u ooyayeen Juuliyat, qaarna waxay u ooyayeen Baariis, inta kalena waxay u ooyayeen Roomiyo. Maxaa dhacaya?

Ilaaladii waxay tuseen maydadkii. Markii Mantiigu imid, isagu horuu u murugaysnaa waayo xaaskiisii ayaa imika dhimatay. “Waxay aad aad uga murugaysnayd ciqaabida Roomiyo” “Maxaa xagan ka dhacay?” ayuu yidhi. Wuxuu arkay maydkii inankiisa wuxuuna bilaabay inuu ooyo.

“Maxay…? Side…?” Meelkasta murugaa taalay. Qofna muu fahmi karayn waxa ka dhacay Meesha, lakiin, waxay arkeen dhalinyartii ay jeclaayeen oo dhimatay. In yar kadib, baadarigii ayaa u sheegay waxa dhacay. “Juuliyat iyo Roomiyo si qarsoodi ah ayay isku guursadeen malintii uu Roomiyo Tayabal dilay. Aniga ayaa isku guuriyay. Barbaarisadu way ogtahay.” Wuxuu u sharaxay wuxuu u siiyay dawada Juuliyat iyo siduu qorshuhu u qaldamay. “Waa qaladkayga, idaaya aan dhintee,” ayuu yidhi.

“Roomiyo adeegihiisii wuxuu wali hayay waraaqdii uu udhiibay Roomiyo isaga, boqorkaana akhriyay.” “Wuxuu baadarigu leeyahay waa run,” ayuu yidhi. “Dhalinyartani iyagaa is dilay maxaa yeelay way is jeclaayeen, lakiin ismay jeclaan karayn waayo maxaa yeelay magacyadooda. Kaabulat! Mantigiyuu! Bal eega dagaalki labadiina qoys dhexdiina wuxuu sababay! Qof waloo aad jeclaydeen waa la dilay.” Kaabulat iyo Mantigiyuu waxay isku

eegeen si murugo leh. Waxay ogaadeen in ay run tahay. Way is gacan qaadeen waxayna isku waafaqeen inay waligood saaxiib ahaadaan. Ugu danbayntii, dagaalkii labada qoys dhex yaalay wuu dhamaaday.

Waxaan jeclaan lahaa inaad ila wadaagto talo, Tusaale, waydiin, soo jeedin, bogaadin, adigoo

Igala soo xidhiidhaya halkan hoose.

E-mail; abdihakemadem433@gmail.com

Mobile; +252634336158.